MACHADKA SALDHIG
SALDHIG INSTITUTE

# XIRIIRKA ISTIRAATIIJIGA AH EE AL-SHABAAB & XUUTIYIINTA IYO KHATARTIISA AMNI EE GOBOLKA IYO DUNIDA



Febraayo 2026 | Muqdisho, Soomaaliya

# XIRIIRKA ISTIRAATIIJIGA AH EE AL-SHABAAB & XUUTIYIINTA

## IYO KHATARTIISA AMNI EE GOBOLKA IYO DUNIDA

# TUSMO


| | |
|---|---|
| Soo-koobid | 5 |
| Habka Cilmibaarista | 7 |
| Bar-bilow | 7 |
| Xiriirka Taariikheed ee Ururka Al-Qaacida iyo Xarakada Al-Shabaab:… | 8 |
| Al-Shabaab: Bilowga Iskaashi Ka Baxsan Salafiyadda Jihaadiga… | 10 |
| Kobaca Xiriirka | 16 |
| Qaab-dhismeedka Xiriirka | 16 |
| Xubnaha Muhiimka ah ee Qaabeeya Iskaashiga | 17 |
| Maxaa u qabsoomey ilaa hadda? | 19 |
| Guudmar | 19 |
| Is-weydaarsi Agab | 19 |
| Macaamil maaliyadeed | 20 |
| Is-weydaarsi Farsamo iyo Tababar | 20 |
| Howlgallo wadajir ah | 21 |
| Ujeedooyinka Al-Shabaab ee Xiriirka | 21 |
| Khataraha iyo Caqabadaha Horyaalla Al-Shabaab | 24 |
| Ujeedooyinka Istaraatiijiyadeed ee Xuutiyiinta | 24 |
| Sida ay u maareeyaan iskaashiga | 26 |
| Khataraha ay wajahayaan xuutiyiinta | 26 |
| Al-Shabaab, Al-Qaacidada Jasiiradda Carabta, iyo Xuutiyiinta | 27 |
| Xiriirka u dhexeeya Al-Shabaab iyo Al-Qaacidada Jasiiradda Carabta | 27 |
| Dhinacyada Khilaafka Al-Shabaab iyo Al-Qaacidada Jasiiradda Carabta | 28 |
| Al-Qaacidada Jasiiradda Carabta iyo Xuutiyiinta | 29 |

| | |
|---|---|
| Saddex-Xagalka: Al-Shabaab, Al-Qaacidada Jasiiradda Carabta, iyo Xuutiyiinta | 29 |
| Horumarrada suurtagalka ah ee iskaashiga | 30 |
| Caqabadaha uu wajihi karo Iskaashiga kooxaha | 31 |
| Xaaladaha mustaqbalka | 31 |
| Saamaynta Xiriirka Labada Kooxood | 32 |
| Heer Qaran | 32 |
| Heer Gobol | 33 |
| Heer Caalami | 33 |
| Saameyntiisa gudaha Ururrada | 33 |
| Natiijooyin Juqraafi-Siyaasadeed | 34 |
| Talo Soo Jeedin | 35 |
| Xaaladda istaraatiijiyadeed kama dambaysta ah | 37 |

# Soo-koobid

Warbixintani waxay bixinaysaa falanqayn qoto-dheer oo ku saabsan xiriirka istaraatiijiyadeed oo ay ku jiraan dhinacyada iskaashiga ee u dhexeeya Xarakada Al-Shabaab Al-Mujaahidiin ee Soomaaliya iyo Ansar Allah, oo sidoo kale loo yaqaan Xuuthiyiinta, ee Yemen. Waxay sii gorfaynaysaa asalka iskaashigan, waxayna baaraysaa dabeecadda iyo heerka bisaylka xiriirka, iyada oo falanqaynaysa cawaaqibka ballaaran ee ay ku yeelan karto amniga gobolka iyo kan caalamka. Iyadoo la garowsan yahay in cilmi-baaris hore oo arrintan ku saabsan ay xaddidan tahay, haddana, warbixintani waxay soo bandhigaysaa falanqayn cusub oo ku tiirsan shabakadaha ballaaran ee Machadka (SI) ee Soomaaliya iyo Yemen gaar ahaan, iyo guud ahaan gobolka Geeska Afrika.

Marka laga eego dhinaca Al-Shabaab, Yemen waxay u tahay xudun taageero dibadeed oo muhiim ah; waxayna u sahashaa helitaanka hub, rasaas iyo agabka kale ee la xiriira, fursado tababar, iyo shabakado badeed oo ay adag tahay in meel kale laga helo. Dhanka kale, Xuutiyiintu Soomaaliya waxay u arkaan fursad ay ku yareeyn karaan culayska go'doominta dhaqaale isla markaana ay uga baxsan karaan cunaqabataynta caalamiga ah. Sidaas awgeed, iskaashigan waxaa bari-taarayaa danaysi wax-ku-ool ah -sida ganacsi sharci-daro ah, saadka la wadaago, iyo xog-ururin badeed- in kabadan aragtiyaha mabda'iga ah. Iskaashigan labo-geesodka ah: Xuutiyiintu waxay ku bixiyaan qalab, xirfad farsamo iyo aqoon; halka Al-Shabaab ay xaqiijiso marinno socdaal oo ammaan ah, xawalado dhaqaale, iyo xiriirro ganacsi oo qorsoon.

Al-Shabaab dhankooda, xiriirkani waa daruuri si ay u ilaashadaan dhaqaalahooda iyo awooddooda ciidan; Xuutiyiinta, waxa uu u yahay furaha ballaarinta saameyntooda Geeska Afrika iyo guud ahaan wadamada ku teedsan Badda Cas. Isla mar ahaantaana, iskaashigu wuxuu xanbaarsan yahay khataro waaweyn oo labada dhinacba ku wajahan, maadaama uu la kulmo kala-qaybsanaan mad-habeed oo qoto-dheer oo u dhexeeya Shiico iyo Sunni, halis dhexgalaangal, iyo suurtagalnimada in cunaqabatayn lala beegsado ay sii kororto.

Ururka Al-Qaacida, oo ah awood muhiim ah oo ka xifaaltanta Jasiiradda Carabta, ayaa ka faa'iidaystay xiriirka Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta. Al-Shabaab waxay si dhab ah u noqotay dhexdhexaadiye ama xarun isku xirta laba garab oo haddii kale mabda' ahaan is-diidi lahaa. Marka loo eego colaadda Gaza ee sii xoogeysatey, xasillooni-darrada Yemen ka taagan ee sii korortey, iyo tartanka loogu jiro maamulka Badda Cas oo sii cuslaadey, waxa ay u badan tahay in waqtiga dhow ee soo aaddan uu iskaashigan sii bullaalo. Waxa muhiimka ah ee xiriirka ku jira waa in xeerka pragmatism-ka (isla macaamilka danaha gaarka ku dhisan) uu yahay tiirka ugu weyn ee xiriirkan.

Iskaashigani wuxuu faa'iido u leeyahay Al-Shabaab maadaama uu siinayo fursado ay ku xoojiyaan awooddooda hawlgal, isla markaana uu kordhiyo saameyntooda gobolka. Heer caalami ahaan, wuxuu kordhinayaa karaankooda khalkhalgelinta (maraakiibta ganacsiga iyo sahminta tamarta) marinada badaha Baabul-Mandab, Badda Cas iyo badwaynta Hindiyaba  Waxa kale oo uu wiiqi karaa isu-dheellitirka gudaha ee shabakadda Al-Qaacida ee ballaaran, wuxuuna Iiraan siin karaa marin aan toos ahayn oo ay ku xoojiso kuna adkayso saameynteeda Afrika.

Sidaas darteed, warbixintu waxay ku talinaysaa in Soomaaliya iyo dalalka dariska -iyo shuraakada caalamiga ah ee ay dantu qasbayso- ay si weyn u xoojiyaan iskaashiga xog-ururinta badda, isla markaana ay adkeeyaan ceejinta dhaqaale-hoosaadka (shadow economies) ay maalgelinayso Al-Shabaab. Shuraakada caalamiga ah waxay door muhiim ah ka ciyaari karaan, tusaale ahaan, fulinta barnaamijyo wadajir ah oo lagu yareynayo taageerada maxalliga ah ee kooxaha xagjirka ah, iyo wanaajinta wadaagista xogaha-sirdoon. Heer goboleed, ururrada sida Jaamacadda Carabta iyo Midowga Afrika waxaa lagu boorinayaa inay sameeyaan istaraatiijiyad isku-duwan oo lagu ilaalinayo amniga Badda Cas iyo xakamaynta xiriirka Xuutiyiinta iyo Al-Shabaab ee sii kobcaya.

Gebogebadii, xiriirka u dhexeeya Xuutiyiinta iyo Al-Shabaab waxaa loo arki karaa inuu yahay iskaashi ku dhisan yoolal wadaag ah, kuna tiirsan baaqi-joog iyo istaraatiijiyad. Inkastoo uu labada dhinacba u roon yahay muddada gaaban uu jiro, haddana waxa uu caqabad weyn -oo sii kordhaysa- ku yahay xasilloonida Soomaaliya, amniga gobolka, iyo badbaadada marin-ganacsiyeedka caalamiga ah.

# Habka Cilmibaarista

Warbixintani waxay soo bandhigaysaa falanqayn dhammaystiran oo ku saabsan xiriirka istaraatiijiyadeed, siyaasadeed iyo dhaqaale ee u dhexeeya dhaqdhaqaaqa Xuutiyiinta ee Yemen iyo Xarakada Al-Shabaab ee Soomaaliya. Warbixintu waxay adeegsanaysaa hab-raac isku-dhafan oo isu keenaya cilmi-baaris tiro-koob (quantitative) ah iyo mid tayo-koob (qualitative) ah. Cilmi-baarista tiro-koobka waxay ku tiirsan tahay xog la xaqiijiyey oo ay ka mid yihiin -tusaale ahaan- tahriibinta hubka iyo xiriirrada maaliyadeed, kuwaas oo laga soo ururiyey warbixinno la heli karo iyo hannaan kormeer oo caalami ah oo kala duwan. Xogta tayo-koobka ahna waxa laga helay ilo sirdoon oo heer sare ah iyo wareysiyo lala yeeshay mas'uuliyiin amni oo ka shaqeeya amniga badda iyo la-dagaallanka argagixisada ee Bariga Dhexe iyo Geeska Afrika. Daraasaddu waxay la kulantay caqabado kooban, oo ay ka mid yihiin tixgelinno anshaxeed oo ka hor istaagay Machadka (SI) inuu si buuxda u shaaciyo macluumaad xasaasi ah sababo amni awgood.

## Bar-bilow

Machadka (SI) wuxuu aqoonsan yahay warbixinnada ilaa hadda soo baxay ee isku dayay inay kala furfuraan iskaashiga la sheegayo ee soo ifbaxaya ee u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta. In kasta oo ay sii kordhayaan qoraallada lagu sameeyo xiriirka Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta, haddana waxaa jira wadar-oggol ballaaran oo ku saabsan adkaanta xaqiijinta sheegashooyinka dhabta ah (ISS, 2026).[1] Iskaashiga waxaa lagu sifeeyaa "iskaashi sii kobcaya", taas oo muujinaysa faa'iidooyinka istaraatiijiyadeed ee ay labada dhinacba heli karaan (Africa Center for Strategic Studies, 2025).[2]

Qaar kale waxay u arkaan si xaddidan, iyaga oo ka eegaya ujeeddooyinka siyaasadda dibadeed ee Iiraan, iyaga oo sheegaya in isballaarinta Xuutiyiinta ee Geeska Afrika ay tahay "raadadka Iiraan" ee Geeska Afrika (C.E, 2025).[3] Halka kuwo kalena ay ku qaabeeyaan inuu yahay isballaarin hal-dhinac ah, oo ay Xuutiyiinta leeyihiin kaasoo ujeeddadeedu tahay oo keliya dhismaha "shabakad iska-caabin" oo xooggan (RUSI, 2024).[4]

Sidaasi oo ay tahay, haddana, gorfeynta la xiriirta horumarinta fahamka waxa Al-shabaab ku riixaya xiriirkaas aad bey u yar tahay; fahamkaas oo ay tahay inuu ku dhisnaado falanqayn taariikheed oo Machadka (SI) soo gudbin karo. Arrintani waxay sidoo kale iftiiminaysaa baaxadda, qoto-dheeraanta, khataraha iyo suurtagalnimada horumarka iskaashiga labada kooxood, iyo weliba saamaynta uu ku yeelan karo Soomaaliya iyo guud ahaan Geeska Afrika.

In kasta oo falanqayntani ku salaysan tahay horumarrada xiriirkaasi ilaa dhammaadka 2025, haddana muuqaalka juqraafi-siyaasadeed ee is-beddelaya -gaar ahaan is-beddelka doorka Boqortooyada Sacuudiga iyo Imaaraadka Carabta ee Yemen iyo guud ahaan Badda Cas- wuxuu adkaynayaa baahida loo qabo faham firfircoon oo ku saabsan xiriirradaas. Natiijooyinka warbixintu weli waa mid si u khuseysa moowduucaas, balse waa in la fasiro iyadoo la tixgelinayo dib-u-isu-habaynta saamaynta gobolka iyo saamileyda amni ee socota.

1 International Institute for Strategic Studies (2026) 'Lawless Seas, Contested Shores – Piracy, Smuggling and the Scramble for Port Access in the Horn of Africa.

2 Africa Center for Strategic Studies (2025) 'Expanding Al-Shabaab-Houthi Ties Escalate Security Threats to Red Sea Region.

3 Carnegie Endowment for International Peace (2025) 'Dhows, Drones and Dollars: Ansar Allah's Expansion into Somalia.

4 RUSI (2024) 'Beyond the Axis: Yemen's Houthis are Building Their 'Network of Resistance'.

# Xiriirka Taariikheed ee u dhexeeya Ururka Al-Qaacida iyo Xarakada Al-Shabaab: Aasaaska, horumarrada iyo Khilaafaadka Gudaha (1991–2025).

Kadib burburkii dowladdii dhexe ee Soomaaliya sanadkii 1991, Ururka Al-Qaacida wuxuu u arkay Soomaaliya keliya ma aha dal aan dawlad ka jirin'e, balse inuu yahay marin istaraatiiji ah oo u gudba Bariga Afrika, Badda Cas, Badweynta Hindiya iyo Jasiiradda Carabta; dhammaantoodna ku xiran waddooyinka ganacsiga badda ee ugu muhiimsan dunida. Xiriirradii u horreeyay ee u dhexeeyay Al-Qaacida iyo Islaamiyiinta Soomaaliyeed waxay bilaabmeen 1991, iyada oo ay ugu horreeyeen shirar qarsoodi ah oo ka dhacay xadka Kenya iyo gobolka Jubada Hoose, halkaas oo Xasan Turki uu ku haystey tiro islaamiyiin xagjir ah. Intii lagu jiray muddadaas, mas'uuliyiin sar-sare oo Al-Qaacida kamid ah ayaa si qarsoodi ah u soo galay Soomaaliya, kuwaas oo ay ka mid ahaayeen Abu Hafs al-Masri, Abu Talha al-Sudani, Saalax Nabhaan, Abu Maxamed al-Masri iyo Maxamed Fadal Cabdallaah. Waxaa loo soo diray inay dhisaan shabakado, qiimeeyaan xaaladda amni, tababaraan dagaalyahanno maxalli ah, isla markaana ay go'aamiyaan in Soomaaliya mustaqbalka noqon karto jiid dagaal oo lagaga hortago Maraykanka iyo danihiisa.[5]

Dirkii Howlgalka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNISOM) dabayaaqadii 1992, waxa ay u aragtey Al-qaacidda faragelin reer-galbeed oo ka dhan ah dal Muslim ah. Shaqsiyaad ay ka mid ahaayeen Abu Talha al-Sudani, Saalax Nabhaan, Abu Hafs iyo Abu Maxamed al-Masri ayaa ku caawiyey kooxo Soomaaliyeed inay dagaal hubeysan uga hortagaan ciidamada shisheeye. Dagaalyahanno horey tababar iyo dagaal ugu soo qaatay Afgaanistaan ayaa dejiyay barnaamijyo tababar oo diiradda saaraya hawlgallo weerar ah iyo isticmaalka walxaha qarxa. Qoraallo badan ayaa sidoo kale xaqiijinaya in xubno xiriir lalahaa Al-Qaacida ay door weyn ka qaateen weerarradii lagu qaaday ciidamada Maraykanka ee Soomaaliya,[6] gaar ahaan dhacdadii ridistii diyaaradda "Black Hawk" sanadkii 1993. Dhacdadan waxay noqotay tiir muhiim u ah sheekada Al-Qaacida ee Maraykanka ku sifaynaysa "Cadow jilicsan" oo u nugul inuu dib u gurto marka uu la kulmo khasaare culus.

Sagaashamaadkii qarnigii 20aad, tiro ka mid ah xagjirka Soomaaliya ee magaca lahaa ayaa ka baxay Soomaaliya si ay uga qayb qaataan dagaalladii Afgaanistaan iyo Kashmiir, halkaas oo shabakadaha Al-Qaacida ay ka wadey howlgallo firfircoon. Markii colaadahaasi istaageen, qaar badan ayaa dib ugu soo laabtay Soomaaliya iyagoo wata waayo-aragnimo dagaal, xirfad ku saabsan walxaha qarxa, iyo xiriirro sii xoogaystay oo ay la lahaayeen shabakadda caalamiga ah ee Al-Qaacida. Al-Qaacida waxay u aragtay ururka Al-Itihaad al-Islaami (AIAI) -oo ahaa ururkii ugu horreeyay ee Soomaaliyeed ee hubeysan kuna dhisnaa aragtida jihaadka caalamiga ah- inuu yahay marin muhiim ah oo loo mari karo bulshada Soomaaliyeed, waxayna taageertay xeryo tababar oo ku yaallay goobo ay ka mid ahaayeen Bu'aale, Gedo, Raas Kambooni iyo qaybo ka mid ah bariga dalka. Xeryahaas xubnihii ka baxay ayaa badankood markii dambe noqdey saraakiisha ugu muhiimsan ee Al-shabaab.

5 Anatomy of Terrorist Attack: In-Depth Investigation Into the 1998 Bombings of the U.S. Embassies in Kenya and Tanzania, Matthew B. Ridgway Center for Security Studies, University of Pittsburgh, 2005.

Sanadkii 2006, markii Midowgii Maxkamadaha Islaamiga ah uu la wareegay gacan-ku-haynta Koonfurta iyo Bartamaha Soomaaliya, garabka ciidanka (xagjirka ahayd) ee maxkamadaha ayaa markii dambe noqdey Xarakada Al-Shabaab. Tani waxay u ahayd fursad cusub Ururka Al-Qaacida. Shaqsiyaad ay ka mid ahaayeen Abu Talha al-Sudani, Maxamed Fadal Cabdallaah iyo Saalax Nabhaani ayaa bixiyay taageero ballaaran oo isugu jirtay tababar, talo iyo agab, iyagoo ku hamminayay in Soomaaliya loo beddelo saldhig jihaadi ah oo muhiim ah, sida Afgaanistaan oo kale.[7]

Sanadkii 2009, aasaaskii Ururka Al-Qaacida ee Jasiiradda Carabta (AQAP) wuxuu mar kale faa'iido u ahaa Al-Shabaab, maadaama uu fududeeyay marin joogto ah oo u dhexeeya Yemen iyo Soomaaliya. Isu-socod badeed oo sharci-darro ah iyo shabakado tahriib ah ayaa suurto-geliyay kala gudbinta dagaalyahanno, hub iyo dhaqaale, gaar ahaan xeebaha bari ee Soomaaliya iyo xeebaha galbeed ee Yemen. Marka laga soo tago saadka, waxaa jiray is-dhaafsi aqoon farsamo iyo xoojin mabda', gaar ahaan horumarinta walxaha qarxa ee gaadiidka lagu rakibo iyo hawlgallada is-qarxinta oo ka heer sarreeyay kuwii hore Somaliya uga dhici jirey.

Si kastaba ha ahaatee, xawliga iskaashiga u dhexeeya AQAP iyo Al-Shabaab wuxuu abuuray tartan gudaha ah.[8] Markii Axmed Cabdi Godane (Abu Zubayr) loo doortay Amiirka Al-Shabaab, wuxuu bilaabay hannaan uruurin awoodeed oo adag, isaga oo doonayay in go'aannada hoggaanku noqdaan kuwo aan la diidi karin. Waxaa la xaqiijiyey in qaar ka mid ah mas'uuliyiinta ku dhow Al-Qaacida, sida Fadal Cabdallaah (Fazuul), ay ka horyimaadeen hab-dhaqanka Godane. Khilaaf xooggan ayaa la socday ka gaabsiga Godane ee muujinta daacadnimo buuxda oo uu siiyo Al-Qaacida illaa uu ku qasbanaadey 2012. Fazuul Cabdalla -oo ahaa ninka inta badan lagu tilmaami jiray wakiilka Al-Qaacida- ayaa la dilay sanadkii 2011 xilli uu isku dayayay inuu ka gudbo bar-kontorool amni oo ku dhow Muqdisho. Waxaa laga helay gaarigii uu watey "Hard-disk" ay ku jireen dukumeentiyo muhiim ah, oo ay ka mid ahaayeen waraaqo uu u diray hoggaanka sare ee Al-Qaacida. Waraaqahaas, Fazuul wuxuu si adag ugu cambaareeyay Godane, isaga oo ku eedeeyay inuu doonayo inuu dhisto "boqortooyo" u gaar ah oo ka janjeerta qaab-dhismeedka guud ee jihaadka caalamiga ah, isla markaana uu carqaladaynayo qodobo muhiim ah oo ka mid ah istaraatiijiyadda goboleed ee Al-Qaacida, gaar ahaan laba arrimood oo noqday meelaha ugu waaweyn ee khilaafka.

Arrinta koowaad waxay ahayd diidmada Godane ee istaraatiijiyadda Al-Qaacida ee ku wajahnayd dhisidda isbahaysi xooggan oo lala yeesho Eritrea si loo helo hub tiro badan iyo taageero siyaasadeed. Arrinta labaadna waxay ahayd diidmada talooyinka lagu doonayay in Ciidanka Itoobiya lagu soo jiido gudaha Soomaaliya -ha noqoto daandaansi ama ku qasbid-taasoo ahayd istaraatiijiyad ay Al-Qaacida u aragtay hab lagu dhiig bixin karo Itoobiya dhinaca milatariga, laguna wiiqi karo awooddeeda, taas oo fududayn lahayd ballaarinta hawlgallada gudaha Itoobiya.[9]

7 Wareysi mid kamid ah aas'aasayaasha Al-shabaab, November 2025.
8 ISS (2011), 'The Killing of Fazul Abdullah Mohammed in Somalia a blow to Al Shabaab'.
9 Wareysi mid kamid ah saaxiibadii hore ee Godane, November 2025.

Aragtida Fazuul marka laga eego, tallaabooyinkan waxay ahaayeen kuwo lama huraan u ah dhisidda awood jihaadi oo saldhigata Bariga Afrika. Godane se wuxuu rumaysnaa in la macaamilka Eritrea uu ururka u muujin karo mid ku lug leh siyaasadda ama ku xiran dano shisheeye. Wuxuu sidoo kale aaminsanaa in la dagaallanka Addis Ababa uu wiiqi doono awoodda maamul iyo tan milatari ee Al-Shabaab. Godane wuxuu adkeeyay in Al-Shabaab ay si buuxda u ilaashato madax-bannaanideeda -oo ay ku jirto xakamaynta dagaalyahannadeeda, dhulkeeda, nidaamyadeeda maaliyadeed, hay'adaha garsoorka iyo qaababka maamul- isla markaana aanay u hoggaansamin tilmaamo ka imanaya dibadda Soomaaliya.[10]

Cawaaqibtii ka dhalatay khilaafkan waxay ahaayeen kuwo aad u culus. Al-Shabaab waxay la kulantay kala-qaybsanaan gudaha ah, taas oo ku kalliftay Godane inuu bilaabo hawlgallo ka dhan ah hoggaamiyeyaal mucaarad ah. Isku-dhacyadaasi waxay horseedeen dilalka shaqsiyaad caan ah, oo ay ka mid ahaayeen Ibraahim al-Afghaani, Macallin Burhaan iyo kuwo kale sanadkii 2013. Arrintani waxay ugu dambayn keentay hoos-u-dhac ku yimid kalsoonidii iyo aaminaaddii Al-Shabaab ee Al-Qaacida. Inkastoo ay weli jiraan isu-ekaansho mabda' oo u dhexeeya labada urur, haddana waxaa si cad u soo baxay kala duwanaansho ku saabsan istaraatiijiyadahooda dibadda iyo yoolalkooda siyaasadeed ee ballaaran ee gobolka.

# Al-Shabaab: Bilowga Iskaashi Ka Baxsan Salafiyadda Jihaadiga iyo Ka-go'itaanka Istaraatiijiyadeed ee Ururka Al-Qaacida

Sanadihii xigay, xiriirka soo ifbaxayay ee Al-Shabaab la yeelatay dhaqdhaqaaqa Xuutiyiinta ee Yemen wuxuu muujiyey in ururku bilaabay inuu ka tallaabo xuduudihii caadiga ahaa ee Salafiyadda jihaadiga. Inkastoo hoggaanka sare ee Ururka Al-Qaacida uu si xaddidan oo aan toos ahayn ula falgalay liraan, haddana ma jiraan caddeymo muuqda oo sheegaya in Ururka Al-Qaacida ee Jasiiradda Carabta (AQAP) uu xulufo la noqday Xuutiyiinta. Daraasaddani waxay muujinaysaa in Al-Shabaab ay si pragmatism ah ula shaqaysay Xuutiyiinta, iyadoo u aragta xiriirkan inuu yahay marin ganacsi, hub, iyo kasbasho faa'iido istaraatiijiyadeed -inkasta oo labada dhinac ay mabda' ahaan kala duwan yihiin. Arrintani waxay caro gelisay AQAP, waxayna iftiimisay xaqiiqo ballaaran oo ah: Al-Shabaab waxay ka kortay wax ka badan hawl mabda' uun ku dhisan; waxay si isa soo taraysa ugu shaqaynaysaa sidii urur siyaasadeed-ciidan oo ay saameeyaan danaha maxalliga ah iyo fursadaha gobolka.

Intii u dhaxaysay 2020 iyo 2025, isbahaysigii u dhexeeyey Ururka Al-Qaacida iyo Al-Shabaab wuu sii jiray, hase yeeshee wuxuu ahaa mid jilicsan; waxaa isku hayay xiriirradii taariikhiga ahaa, balse waxaa kala fogeynayey kalsooni-darro, tartan istaraatiijiyadeed, iyo mugdi ku saabsan jihada mustaqbalka ee jihaadiyiinta gobolka. Ururka Al-Qaacida wuxuu Al-Shabaab u arkayay laanta ugu guulaha badan Afrika. Dhankeeda, Al-Shabaab waxay sii kordhisay inay ku shaqayso shuruudaheeda, iyadoo xiriirrada dibadda u aragta kuwo "heshiis-ganacsi" u badan, kana yara

10 Isla Isaga.

fog qaab-dhismeed amar-hoosaad (hierarchy). Maanta, waxa uu ururku si pragmatism ah ugu tiirsan yahay isku-darka hadallo diini iyo jihaadi ah, shabakado ganacsi oo qarsoon, ka faa'iiday-siga tabashooyinka beelaha, iyo samaynta xiriirka lala yeesho dhinacyo aan la filayn marka uu arko faa'iido istaraatiijiyadeed.

Markii uu kobcey hindisaha aydaloojiyad ee Al-Shabaab -gaar ahaan kadib dilkii Godane iyo hoggaamintii xigtay ee Axmed Diiriye, oo si isa soo taraysa ugu tiirsanaa kheyraadka gudaha Soomaaliya- kooxdu waxay billowday inay dib u qiimeyso xiriirradeeda iyadoo ka jawaabaysa isbeddellada caalamiga ah. Ururka Al-Qaacida markan dambe uma ekayn ururkii xoogga bad-naa ee uu ahaa intii u dhaxaysay qiyaastii 2000 ilaa 2011; AQAP wuxuu lumiyay dhul iyo saame-yn aad u badan; Ururka Daacish (ISIS) wuxuu bilowgisii maamulay dhulal ka mid ah Suuriya iyo Ciraaq, ka hor intaan si weyn loo wiiqin; waxaana soo baxay colaado cusub oo ka curtay meelo kala duwan oo dunida Islaamka ah. Isbeddelladan intii ay socdeen, Al-Shabaab way sii jirtay: waxay maamushay dhul, waxay ururisay canshuur, waxay bixisay garsoor maxalli ah, waxay faa'iido ka heshay hawlo sharci-darro ah, waxayna isu aragtay -ineysan ahayn "laan-hoosaad"- balse ay tahay awood maxalli ah oo leh tub istaraatiijiyadeed iyo saameynteeda gaar ah.

Macnahaas ayaa waxaa ka dhashay dood istaraatiijiyadeed oo gudaha ah: Kee baa ka faa'iido badan kan kale: Madax-bannaani urureed oo buuxda oo ay weheliso xiriirro dabacsan, ama in lagu sii jiro xabsiga "summad jihaad caalami ah" oo kordhisa cadaadis iyo diidmo caalami ah oo ka dhan ah ururka? Su'aashani waxay udub-dhexaad u noqotay istaraatiijiyadda hoggaan-ka Al-Shabaab, iyagoo qiimeynaya caqabadaha iyo fursadaha, iyo suurtagalnimada iskaashi dibadeed oo aan kaliya dheerayn karin cimriga ururka, balse sidoo kale kordhin kara muhiimad-diisa muuqaalka juqraafi-siyaasadeed ee is beddelaya; gaar ahaan marka la eego xiriirrada Israa'iil iyo dalalka Khaliijka.

Isla waqtigaas, colaadda Yemen waxay gaartay heerarkeedii ugu xumaa, iyadoo Xuutiyiintu ka soo gudbeen dhaqdhaqaaq u muuqday mid kooban una baddaleen hay'ad ciidan oo awood leh, oo leh xeelado casri ah, shabakado ballaaran, iyo istaraatiijiyad badeed oo ku xiran ganacsiga caalamka. Waxay noqdeen tusaale casri ah oo muujinaya sida urur aan dawli ahayn uu u gaari karo awood ku filan inay xitaa dowlado ku qasbato wada-xaajood.

Hoggaanka Al-Shabaab wuxuu ka bartay isbeddelkan: haddii dhaqdhaqaaq Shiici ah oo cadaadis xooggan saaran yahay uu u beddeli karo sharci-darrada iyo go'doominta "xukun waara", sidee Al-Shabaab ugu adeegsan kartaa xeelado la mid ah isku xirnaan iyo dabacsanaan siyaasadeed, si ay u go'aamiso mustaqbalkeeda? Sidaas darteed, ayuu isbahaysiga qarsoon ee u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta uu u xoogaystay. Wuxuu ku bilowday is-dhaafsi xog iyo howl fudu-dayn badeed, kadibna wuxuu u gudbay iskaashi dhanka saadka iyo farsamada ah. Waxaa la wariyey in qaar ka mid ah xubnaha heerka-dhexe ee Al-Shabaab ay heleen tababar la xiriira walxaha qarxa iyo diyaaradaha yaryar oo aan duuliye lahayn, halka Xuutiyiintu ay heleen ma-cluumaad iyo adeegyo la xiriira Gacanka Cadmeed iyo marin-badeedka muhiimka ah ee isku xira Badda Cas iyo Badweynta Hindiya.[11]

11 Sarkaal Al-shabaab ka tirsan, Jilib, October 2025.

Markii iskaashigu sii qoto dheeraaday, saameyntii Ururka Al-Qaacida ee gudaha Al-Shabaab way yaraatay. Fikraddii hore ee ahayd in Al-Qaacida uu yahay "aasaasaha" jihaadka waxay u muuqataa mid duugoowday. Marxaladdan, Al-Shabaab waxay dhistay qaab-dhismeedyo maamul, ilo dakhli gudaha ah, hannaan cabburin adag, iyo awood ciidan iyo sirdoon oo la xoojiyey. Uma muuqan inay u baahan tahay "summad" ku xiran Afgaanistaan; waxayse si isa soo taraysa u doonaysay inay isu taagto ama isu muujiso awood ka jirta Geeska Afrika iyadoo adeegsanaysa xiriirro kala duwan oo la qabsan kara duruufaha.[12]

Qaar ka mid ah shakhsiyaadka ku dhow hoggaanka Al-Shabaab waxay bilaabeen inay arkaan in ka-go'itaanka Al-Qaacida uu fududayn karo helitaanka "damaanad goboleed" oo suurtagal ah. Waxaana u muuqday in ururku isu muujin karo -ma aha oo keliya urur jihaadi caalami ah- balse urur Soomaaliyeed oo ku dhisan danaha gobolka, oo awood u leh inuu la shaqeeyo shuraako kala duwan marka loo baahdo. Hase yeeshee, isbeddelkan looma shaacin doono si kedis ah; kala-go' degdeg ah wuxuu keeni karaa burbur ama xitaa dagaal gudaha ah.[13] kala guurku iyo mabda'a cusub wali waxa uu ku jiraa xaalad si tartiib ah loogu caadeeynayo ilaa uu gudaha ka noqdo mid la aqbalo.

Hab-fikirkan cusub wuxuu ku taagan yahay saddex tiir oo waaweyn: madax-bannaani siyaasadeed oo ka madax-bannaan Al-Qaacida; xiriirro dabacsan oo la jaanqaadaya masiirka siyaasadeed ee la filayo ee Soomaaliya; iyo awood ciidan oo aan si buuxda ugu tiirsanayn tababar iyo kheyraad shisheeye. Xiriirka Xuutiyiinta ayaa xoojinaya tiirarkan, isagoo adkaynaya fikrad jihaad oo ay ku yar tahay ku-tiirsanaanta hal silsilad amar caalami ah, kana dabacsan.


Si kastaba, hab-fikirkan wuxuu xanbaarsan yahay khataro waaweyn. Gudaha, weli waxaa jira xubno xagjir ah oo u arka Al-Qaacida awood sharciyad diini ah haysata. Kala-go' aan si fiican loo maareyn ama aan loo bislayn wuxuu dhalin karaa kala daadasho ama soo bixitaanka koox ka sii xagjirnimo badan; sida habkii Daacish uga go'day shabakado jihaadi hore oo ka jiray Afgaanistaan, Ciraaq, Suuriya, Yemen, Galbeedka Afrika, iyo Soomaaliya. Dibadda, ka-go'itaanka Al-Qaacida si toos ah ugama dhigi doono Al-Shabaab mid la aqbalo, umana yareyn doono si otomaatig ah in loo aqoonsado urur argagixiso. Bulshada caalamka waxay isbeddelkan u arki kartaa khatar laba-geesood ah oo isku daraysa Salafiyad jihaadi ah iyo maamul fallaago oo pragmatism ah, taas oo horseedi karta hawlgallo cusub oo ciidan iyo kuwo sirdoon oo ay qaadaan quwadaha gobolka iyo xulafada reer-galbeedka.

Ugu dambayn, go'aannada istaraatiijiyadeed ee Al-Shabaab waxay u muuqdaan kuwo ku dhisan mabda' siyaasadeed oo aasaasi ah oo ururku dib ka fahmay: Urrurada ligligan waxay u nugul yihiin fashil, halka kuwa dabacsani inta badan u sii waarayaan siyaabo kala duwan. Haddii magaca Al-Qaacida uu xaddido ururka, waxaa suurtagal ah in la fududeeyo kala-go' tartiib ah iyadoo la ilaalinayo shabakadaha iyo kheyraadkii uu hore u siiyay. Haddii xiriirka Xuutiyiinta uusan daboolin baahiyaha ururka, isla markaana dakhliga gudaha uu ku filnaado, Al-Shabaab waxay dooran kartaa madax-bannaani ku dhowaad buuxda, iyadoo weli aan la go'aamin jawaabta su'aasha ugu weyn oo ah: Ma waxa ay rabtaa inay sii ahaato qayb ka mid ah ajande xagjir ah oo xuduudda-gudubsan, mise inay isu beddesho "Dawlad-hareed" "Shadow State" u eg sida Taalibaan?

13 Xubin Sare Al-shabaab ka tirsan, October 2025.

Al-Shabaab waxay hadda galaysaa marxaladda dhisidda astaan urureed. Waxay isu tahay ama isu aragtaa awood maxalli ah oo saamayn caalami ah leh, xulufo dibadeed oo dabacsan, iyo rabitaan ay ugu adkaysato dagaal dheer. Ka-go'itaanka Al-Shabaab ee Al-Qaacida uma badna inuu ku yimaado magac-beddel degdeg ah; waxa ay u badan tahay in isbeddelku ka bilaabmo fariimo diris iyo astaamo-bixin. Kooxdu waxay si tartiib ah u yarayn kartaa farmuuqa "bulshada caalamka", iyadoo kor u qaadaysa hal-ku-dhegyo Soomaaliyeed oo diiradda saaraya maamul, canshuur, garsoor, iyo "difaac qaran". Fariimahaas isbeddelku ka muuqdaahi waxay ugu dambayn dhisi karaa dhambaal u sawiraysa dagaalkooda inuu yahay loollan siyaasadeed oo gudaha ah, oo uusan ahayn farac shabakad caalami ah.

# Meeleynta Macnaha Guud ee Xiriirka u Dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta




Badanaa xiriirka u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta waxaa loo sawiraa inuu yahay arrin cusub. Inkastoo, xaqiiqadu tahay in uu ku qotomo xiriirro taariikh iyo juqraafiyeed. Labada urur waxay ka hawlgalaan laba dal oo ku kala yaalla labada dacal ee Gacanka Cadmeed iyo Badda Cas, qaab-dhismeed juqraafi oo taariikh ahaan fududeeyay ganacsiga iyo isu-socodka. Sidaas awgeed, waxaa muhiim ah in xiriirka Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta lagu meeleeyo macnaha taariikheed ee ballaaran ee u dhexeeya Soomaaliya iyo Yemen. Xasillooni-darrada siyaasadeed ee daba-dheeraatay iyo qalalaasaha sokeeye ee ka jira labada dalba waxay abuureen firaaq amni oo ay ka faa'iidaysteen kooxo hubeysan oo aan dawli ahayn, si ay u dhisaan shabakado xuduudaha-dhaafsan oo ka baxsan awoodda dawladaha sharciga ah.

Tan iyo markii ay ka soo baxday haraagii Midowgii Maxkamadaha Islaamiga ah sanadkii 2006, Al-Shabaab waxay Yemen u aragtay marin istaraatiiji ah oo xoojiya waarista iyo koritaanka hawlgalladeeda. Arrintani waxaa qayb ka ahaa howlo si qarsoodi ah loo fuliyey kuwaasoo xoojiyay awoodaha hawlgal iyo saadka Al-Shabaab, fududeeyay kordhinta iskaashiga lala yeesho kooxo jihaadi ah oo xuduud-dhaaf ah, isla markaana dhisay marinnada tahriibinta ee gacanka cadmeed iyo Badda Cas, oo ay ku jiraan waddooyin u dhexeeya waqooyiga iyo bariga Soomaaliya una gudba Mukalla iyo Xudeyda. Tani waxaa markii ugu horreysay aqoonsaday Machadka Hiraal[14] sanadkii 2021, kaas oo sheegay in Yemen ay tahay saldhig hawlgal oo muhiim ah oo ay Al-Shabaab ku ilaaliso kuna ballaariso awoodaheeda hawlgal iyo maamul.

14 Hiraal Institute waxaa lagu bedeley Saldhig Institute (SI).

Bilowgii dagaalka sokeeye ee Yemen intii u dhexeysay 2014–2015 wuxuu sii xoojiyay xiriirkan, sidoo kale wuxuu la jaanqaaday isbeddelka hoggaan ee Al-Shabaab sanadkii 2014. Halka Al-Shabaab ay ka faa'iidaysatay sii liidashada amniga Yemen si ay u raadiso ilo dhaqaale oo cusub una hareer marto cunaqabataynta caalamiga ah, hoggaankeeda cusub wuxuu sidoo kale mudnaan siiyay dhisidda xiriirro lala yeesho ururro ka soo horjeeda Reer Galbeedka, iyada oo aan loo eegin kala-duwanaanshaha mad'habeed. Kooxdu waxay xoojisay xiriirrada ay la leedahay ganacsatada Carabeed iyo kuwa Soomaalida, iyadoo adeegsanaysa xiriirrada ganacsi sida loo qariyo hawlaheeda saadka iyo maaliyadda, iyada oo loo marayo shakhsiyaad ku dhex jira shabakadaha ganacsi iyo bulsho ee Islaamka. Machadka (SI) wuxuu si cad u sheegayaa in la sameeyay xiriirro aan la shaacin oo u dhexeeya Al-Shabaab iyo ganacsato xiriir la leh Xuutiyiinta[15]. Ganacsatadan ayaa fududeeya kala wareejinta badeecooyin, lacago iyo waxyaabo kale oo sharci-darro ah oo ay Al-Shabaab isticmaasho. Macaamiladan waxay adkeeyaan dabeecadda pragmatiga ah ee iskaashiga, kaas oo inta badan ku salaysan is-waafajinta danaha, halkii uu ka ahaan lahaa isu-ekaansho mabda'eed. Intii uu Machadka (SI) ku jirey dabagalka kiiskan ee uu la falgalay ganacsato xiriir la leh Xuutiyiinta,[16] wuxuu ogaadey in Xuutiyiintu Soomaaliya u arkaan xudun ay ku xoojiyaan saameyntooda iyo awooddooda goboleed.

Dhanka kale, awooda xiriirka gadaal ka taagani waa Iiraan, oo muddo dheer u aragtay Geeska Afrika -gaar ahaan Soomaaliya- inuu yahay gobol istaraatiiji ah oo lagu xoojin karo saameynteeda siyaasadeed iyo midkeeda mabda'eed. Iiraan waxay qaadatay hab "awood dabacsan" ah si ay u kasbato quluubta iyo maskaxda dowladaha Afrika ee ay Muslimiintu u badan yihiin, iyada oo adeegsanaysa gargaar bani'aadamnimo, fursado ganacsi oo u muuqda kuwo ku habboon balse qarsoodi ah, iyo hawlo wacyigelin diimeed. Tani waxay u saamaxday Tehraan inay ku fidiso saameynteeda bulshada Muslimiinta ee maxalliga ah iyada oo aan kicin colaado goboleed kale. Sidaas darteed, Iiraan waxay u aragtaa kooxaha jihaadiga ah ee Afrika, oo ay ku jirto Al-Shabaab, inay yihiin marinno suurtagal ah oo lagu gaari karo hammigeeda gobolka.

Inkastoo Al-Shabaab ay si adag ugu dheggan tahay mabda'a Sunniga, haddana iskaashigeeda ay la leedahay Iiraan iyo wakiilladeeda wuxuu -si aan ula kac ahayn- u fududeyn karaa ujeeddooyinka ballaaran ee Iiraan, kuwaas oo ah in la yareeyo heeryada dalalka Khaliijka ee Afrika. Xiriirka u dhexeeya Xuutiyiinta iyo Al-Shabaab, inkasta oo uu yahay mid adag oo inta badan aan toos ahayn, haddana wuxuu ka tarjumayaa istaraatiijiyad Iiraani ah oo ballaaran oo ku dhisan ka faa'iidaysiga xasillooni-darrada Yemen iyo Soomaaliya si loo wiiqo saameynta Reer Galbeedka iyo dalalka Khaliijka ee dalalka ku teedsan xeebaha Badda Cas.

15 Wareysi Ganacsade Somali ah oo ku sugan Sanca, November 2025.
16 Isla Isaga.

# Kobaca Xiriirka

Machadka (SI) wuxuu ku qiimeeyey iskaashiga u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta in uu si tartiib tartiib ah ugu kobcay marxalado kala duwan.[17] Marxaladda koowaad waxay ka bilaabatay ganacsatada Soomaaliyeed ee xiriirka la leh Al-Shabaab, kuwaas oo bilaabay xiriir ay la sameeyaan ganacsato Yemeni ah oo xiriir la leh Xuutiyiinta, isla markaana leh maalgashi ballaaran oo ay ku jiraan shidaalka iyo hubka. Marxaladda labaad waxay u gudubtay iskaashi sirdoon. Markii xiriirrada ganacsi ay sii qoto dheeraadeen, Al-Shabaab iyo Xuutiyiintu waxay bilaabeen inay si qarsoodi ah u wadaagaan macluumaad amni, oo ay ku jiraan faahfaahin ku saabsan hawlgallada milatari ee Maraykanka, howlgallada badda ee NATO, iyo bandhigyadooda ciidan.[18]

Marxaladda saddexaad waxay ahayd iskaashi siyaasadeed iyo mid milatari. Marxaladdan waxaa la rumeysan yahay inay ka mid ahaayeen qorsheyn wadajir ah, is-dhaafsi dagaalyahanno, tababar ciidan, iyo bixinta qalab gaar ah. Warbixinno sirdoon ayaa tilmaamaya in xubno ka tirsan Al-Shabaab loo diray Yemen si ay usoo qaataan tababar ay bixinayaan shakhsiyaad xiriir la leh Iiraan ama ku shaqeeya amarkeeda. Sidoo kale, xubno ka tirsan Xuutiyiinta ayaa u safaray buuraleyda Galgala ee bariga Soomaaliya, halkaas oo ay ku qaateen tababar ku saabsan xeeladaha dagaalka aan sinnayn iyo farsamooyinka weerarada cagmarinta ah ee Al-Shabaab inta badan ku qaaddo xarumaha ciidanka Midowga Afrika iyo Ciidanka Qaranka Soomaaliyeed.

# Qaab-dhismeedka Xiriirka

Iskaashiga u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta ma aha mid lagu meelmariyey heshiisyo qoran ama bayaano la shaaciyey, balse wuxuu ku dhisan yahay is-afgaradyo aan rasmi ahayn iyo iskaashi sirdoon oo ay riixayaan ujeeddooyin wadajir ah. Machadka (SI) wuxuu xaqiijinayaa in xiriirku ku shaqeeyo saddex heer oo isku xiran.[19] Heerka koowaad, ganacsato madax-bannaan oo xiriir la leh Al-Shabaab-Soomaaliya iyo Xuutiyiinta-Yemen ayaa kormeera isu-socodka ganacsi ee badeecooyinka. Heerarka sirdoonka iyo tababarka, hawlwadeenno ka kala socda labada dhinac ayaa ku lug leh is-weydaarsi macluumaad iyo horumarinta awoodaha. Heerarka siyaasadeed iyo milatari, shakhsiyaad xiriir la leh Iiraan iyo hoggaanka sare ee Ururka Al-Qaacidada ayaa door muhiim ah ka ciyaara.

Tani waxay suurtagelisaa xiriir u dhexeeya labada kooxood oo ilaaliya sii shaqayntooda iyo kalsoonidooda, isla markaana caqabad ku noqota dadaallada lagu dabagelayo hawlahooda. Iyadoo cadeymaha muhiimka ah ay weli qarsoonyihiin, ilo sirdoon oo dhowr ah ayaa tilmaamay in xubno badan oo ka kala tirsan Xuutiyiinta iyo Al-Shabaab si gaar ah loogu xil saaray dardargelinta iyo qoto-dheereynta iskaashigan.

17 Isla Isaga.
18 Sarkaal Xuuti ah, Sanca, December 2025
19 Saraakiil ka kala tirsan Al-shabaab iyo Xuutiyiinta, December 2025.

# Xubnaha Muhiimka ah ee Qaabeeya Is-kaashiga

## Xuutiyiinta[20]



**1. Cabdul-Waaxid Naaji Maxamed Abu Raas**

- Madaxa Isballaarinta Dibadda iyo Horumarinta Caalamiga ah
- Waxaa si toos ah looga soo xushay Tehraan. Hawlihiisa gaar-ka ah waxaa ka mid ah isku-duwidda hawlgallada dibadda ee ka socda Iiraan, Lubnaan, Sacuudi Carabiya, Soomaaliya, Kenya, Eritrea, Suudaan, Itoobiya, iyo Qasa.



**2. Xasan Axmed Al-Kahlaani (Abu Shahiid)**

- Madaxa Sirdoonka Dibadda ee Xuutiyiinta
- Khibradihiisa ugu waaweyn waxaa ka mid ah doorkiisii hoggaamineed sanadkii 2014 xilligii ay kooxdiisu qabsatey Sanca, iyo kaalintiisii falal qaraxyo iyo dilal qorsheysan oo ka dhacay Sanca iyo ka-qayb-qaadashadiisii dilka Cali Cabdalla Saalax.

**3. Adham Xumeyd Cabdalla Al-Cifaari (Abu Khaliil)**

- Sarkaal sirdoon oo heer sare ah oo ka tirsan Xuutiyiinta
- Wuxuu kormeeraa galka gaarka ah ee shaqsiyaadka ka soo jeeda Afrika ee ku nool Yemen. Waa isku-xiraha ugu muhiimsan ee u dhexeeya Xuutiyiinta iyo Itoobiya, Soomaaliya, Eritrea, Suudaan iyo Jabuuti, isaga oo mas'uul ka ah tababarka iyo ciidameynta milatari iyo sirdoon ee Xuutiyiinta.

**4. Usaama Xasan Axmed Al-Ma'khadi (Abu Shahiid)**

- Sarkaal sirdoon oo sare, mas'uulna ka ah iskaashiga Xuutiyiinta iyo Al-Shabaab.
- Wuxuu diiradda saaraa dhisidda shabakado xiriir la leh dhalinyarada, culimada, ganacsatada iyo siyaasiyiinta, kuwaas oo loo adeegsan karo horumarinta ajandaha Xuutiyiinta ee Soomaaliya.



**5.Xasan Cali Amiir Al-Miraani**

- Sarkaal sirdoon oo heer sare ah iyo Madaxa Sirdoonka Gudaha ee Xuutiyiinta
- Dukumiintiyo sirdoon oo uu heley Machadka (SI) waxay muujinayaan inuu si toos ah ula shaqeeyo Usaama Xasan Axmed Abu Shahiid, isla markaana uu si toos ah ula xiriiro xubno sare oo Al-Shabaab ah Kalana shaqeeyo arrimo istaraatiiji ah.

**6.Kornayl Abu Xaydar Al-Qaxuum**

- Sarkaal sirdoon oo heer sare ah
- Wuxuu si dhow ula shaqeeyaa Xasan Cali Amiir Al-Miraani. Wuxuu maamulaa iskaashiga ay Xuutiyiintu la leeyihiin Ururka Al-Qaacida ee Bariga iyo Galbeedka Afrika, sidoo kale wuxuu fuliyaa hawlgallo dibadeed oo ay leeyihiin Xuutiyiinta, wuxuuna xiriirro toos ah la leeyahay Saraakiil Al-Shabaab ah.

20 Wareysi, Xubin sare oo Xuuti ah, December 2025.

# Xubnaha Muhiimka ah ee Qaabeeya Iskaashiga

## Al-Shabaab[21]

**1. Abuukar Cali Aadan**

- Ku-xigeenka Amiirka Harakat Al-Shabaab
- waxa uu mas'uul ka yahay galka xiriirka, isla markaana waa Guddoomiyaha Guddiga Isku-duwidda xiriirka xuutiyiinta.



**2. Yaasiin Cismaan Kilwe**

- Mas'uulka galalka milatari, sirdoon, maaliyadeed iyo siyaasadeed ee Al-Shabaab ee Puntland
- Xubin muhiim ah oo ka tirsan Guddiga Isku-duwidda xiriirka Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta. Isaga iyo **Battaar** (oo dhowaan lagu dilay duqayn diyaarad Maraykan aan duuliye lahayn ay fulisey) waxay ka mid ahaayeen shakhsiyaadka ugu saameynta badan qaabaynta xiriirka Xuutiyiinta. Horraantii 2025, Kilwe wuxuu ku martigeliyay wafdi sare oo Xuutiyiin-ta ah Buuraha Galgala, halkaas oo wafdiga lagu tababaray, kadibna loo qaaday Jilib.

**3. Cabdullaahi Tahliil Xiireey (Cabdullaahi Jeeri)**

- Madaxa Hubka ee Harakat Al-Shabaab
- Mas'uuliyadaha ugu waaweyn waxaa ka mid ah soo iibinta hubka iyo tahriibinta dadka.



**4. Maxamed Nuur Jamaac (Malaaq)**

- Madaxa Jabhadda Puntland
- Waa shaqsi udub-dhexaad u ah sii joogtaynta iyo ilaalinta iskaashiga ay Al-Shabaab la leedahay Xuutiyiinta.

21 Sarkaal Al-shabab ka tirsan, Jilib, Dec. 2025.

# Maxaa u qabsoomey ilaa hadda?

## Guudmar

Tan iyo markii uu bilowdey xiriirka u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta dabayaaqadii 2015, waxaa sii kordhayay caddeymo muujinaya in labada urur ay ka gudbeen xiriir uun, una wareegeen iskaashi hawlgal iyo mid maaliyadeed. Horumarradii ugu dambeeyay ee la diiwaangeliyay tan iyo Febraayo 2024 waxay tilmaamayaan in xiriirkani leeyahay dhinacyo badan. Dhinacyadan waxaa ka mid ah -Inkastoo aysan ku koobnayn- kala wareejinta hubka, taageerada dhaqaale, dhismaha awoodaha milatari, hawlgallo sirdoon oo wadajir ah, iyo kormeer lagu sameeyo xeebaha Badda Cas iyo hawada Soomaaliya iyo Yemen labadaba. Xogtu waxay muujinaysaa in xiriirka Al-Shabaab iyo Xuutiyiintu uu ka gudbay macaamil aan rasmi ahayn; wuxuuna isu beddelay shabakad istaraatiijid fulin ah oo lagu horumarinayo danaha labada dhinac.

## Is-weydaarsi Agab

Ilo lagu kalsoonaan karo ayaa xaqiijiyay in doonyo yaryar oo ka soo ambabaxay dekedaha Yemen -oo ay ku jiraan Xudeyda, Al-Mukha iyo Raas Ciise- ay si joogto ah hub ugu qaadeen xeebaha waqooyi, bari iyo koonfur ee Soomaaliya. Hubka la sheegay waxaa ka mid ah qoryo fudfud, qoryo culus, bam-gacmeedyo, miinooyin kuwa dhulka ah, maadooyin loo adeegsado walxaha qarxa ee sida fudud loo sameeyo, hoobiyeyaal, iyo gantaallo garabka laga rido. Warbixinno sirdoon ayaa tilmaamay dhacdooyin badan oo lagu qabtay doonyo ku socdaalayey Badda Cas oo siday hub ka yimid Yemen kuna wajahnaa Soomaaliya. In kasta oo shixnado badan la qabtay, haddana waxaa la soo wariyay in kuwo kale ay gaareen deegaanno ay maamusho Al-Shabaab iyada oo aan la ogaan.[22]

Xuutiyiintu waxay siiyeen Al-Shabaab aqoon farsamo, sida farsamooyinka walxaha qarxa ee gacan ku sameyska ah iyo adeegsiga diyaaradaha aan duuliyaha lahayn [23] ee kharashkoodu hooseeyo. Waxaa la sheegay in hawlgallo dhowr ah oo ay Al-Shabaab ka fulisay Muqdisho iyo Jubbaland ay u adeegsatey xeelado laga soo min-guuriyay Yemen. Waxaa la xaqiijiyay in weerar lagu qaaday garoonka Kismaayo dabayaaqadii sanadkii hore loo adeegsaday diyaarado aan duuliye lahayn oo Al-Shabaab dhowaan ka heshay shabakadaha Xuutiyiinta Yemen.[24]

Ganacsatadu waxay door muhiim ah ka qaateen fududeynta dhaqdhaqaaqyadan. Ganacsato Soomaali iyo Yemeniyiin ah ayaa adeegsaday shirkado kalluumeysi iyo shirkado ganacsi oo sharci ah si ay dahaar ugu noqdaan gaadiidka hubka iyo qalabka kale.[25] In kasta oo tani tahay habka ugu badan ee la adeegsado, haddana waxaa jiray xaalado ay doonyo yaryar si toos ah hub ugu gaarsiiyeen aagagga xeebaha ee ay gaari karto ama ay maamusho Al-Shabaab.

22 Sarkaal Al-shabab kamid ah, Puntland, Nov. 2025.
23 Sarkaal Sirdoonka Xuutiyiinta kamid ah, Sanca, Nov. 2025.
24 U.S State Department, Reward for Justice, press release, January 2026.
25 Sarkaal Xuuti ah, Hudeydah Port, Nov. 2025.

## Macaamil Maaliyadeed

Iskaashiga dhaqaale wuxuu ahaa tiir kale oo muhiim u ah shuraakada. Warbixinno ayaa muujiyey in Al-Shabaab ay ka faa'iidaysato shabakado lacag-dhaqid oo ku fidsan Yemen, Cumaan iyo Jabuuti, halka Xuutiyiintu ay ku tiirsan yihiin nidaamyo maaliyadeed oo qarsoon si ay u maal-geliyaan hawlahooda iyaga oo aan soo jiidan Dareen/Indho caalami ah. Labada dhinacba waxaa lasoo wariyey inay si ballaaran u adeegsadaan kanaallo xawaalado aan rasmi ahayn, gaar ahaan shabakadaha ka shaqeeya Boosaaso, Jabuuti iyo Sanca.[26] Dahab iyo doollar Maraykan ah ayaa loo adeegsadaa macaamillo sharci-darro ah oo ay ku jiraan dhuxul iyo shidaal, iyadoo mararka qaar la adeegsado ganacsiyo dibadeed oo sharciyeysan si loo fududeeyo kala wareejinta lacageed ee xuduudaha ka gudba.

Waxaa kale oo jira caddeymo muujinaya maalgashi wadajir ah ama is-dhexgal ah. Xuutiyiinta waxaa la xaqiijiyey inay maalgashi ku sameeyeen mashaariic badan oo ka jira Soomaaliya, gaar ahaan warshadaha soo saara kheyraadka dhulka.[27] Bishii Abriil 2024, Al-Shabaab waxay dhistay xafiis u qaabilsan macdanta oo ka shaqeeya koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, si loo fuliyo sahamin iyo soo saarid. Kharashaadkii ugu dambeeyay ay bixisey waxaa ka mid ahaa iibsiga doonyo yaryar oo kalluumeysi, iyo sidoo kale dhismaha waax sirdoon badeed iyo xeebeed oo gaar ah. Machadka (SI) wuxuu aqoonsaday shirkado ganacsi oo aan la shaacin oo loo sameeyay kanaallo lacag-dhaqid iyo mashaariic ganacsi oo xiriir la leh Al-Shabaab.[28]

Mashaariicda ganacsi ee wadajirka ah ee labada dhinac ayaa sidoo kale ku fidaya kalluumeysiga, iibsiga wadajirka ah ee doonyo duug ah oo loo adeegsado rarista hubka, iyo qorista saameeyayaal baraha bulshada ah iyo warbaahin maxalli ah si loo leexiyo sheekooyinka iyo farriimaha uguna adeegaan labada dhinac. Warbixinno sirdoon ayaa tilmaamaya in maalgashiyadani ujeedadoodu tahay in la xoojiyo xiriirka iyada oo la dhisayo isku filnaan dhaqaale oo wadajir ah oo xooggan.

## Tababar iyo Farsamo Is-weydaarsi

Iskaashiga dhinaca tababarka wuxuu sii adkeeyay xiriirka. Dagaalyahanno ka tirsan Al-Shabaab ayaa helay tababaro ku saabsan walxo qarxa oo casri ah, difaaca dhulka, xeeladaha dagaalka magaalooyinka, iyo hababka weerarrada diyaaradaha aan duuliyaha lahayn.[29] Tababaradan waxaa bixiyay saraakiil Xuutiyiin ah iyo khubaro Iiraaniyiin ah, kuwaasoo si gaar ah uga dhacay deeganada Sacda iyo Cimraan ee waqooyiga Yemen.

Isla waqtigaas, Al-Shabaab waxay ka fulisay Soomaaliya tababaro diiradda lagu saaray dagaalka dhulka iyo hawlaha sirdoonka gudaha.[30] Muwaadiniin Yemeniyiin ah oo ka tirsan Xuutiyiinta ayaa helay tababar ku saabsan dagaalka awoodda aan sinneyn ama cagmarinta ah ee Al-Shabaab ay khibradda ballaaran u leedahay. Is-weydaarsigan waxaa ku jirey xirfado farsamo, oo ay ka mid yihiin dayactirka hubka iyo walxaha qarxa, samaynta miinooyinka badda, iyo maaraynta nidaamyo sirdoon oo baahsan, kuwaas oo unugyadu u shaqeeyaan si kala madax-bannaan iyaga oo isla wadaagaya macluumaad muhiim ah, haddana aan is aqoon.

26 Wareysi saraakiil ka kala tirsan Al-shabab iyo Xuutiyiinta oo ku shaqo leh Kala wareejinta lacagaha, Bosaso, Jilib iyo Sanca, Nov. 2025
27 Dukumeenti (SI) uu heley oo muujinaya maalgashiga Xuutiyiinta ee Soomaaliya.
28 Wareysi ganacsade xiriir la leh Al-Shabaab, Dec. 2025.
29 Sarkaal Al-shabaab ah oo tababarkaasi qaatey, Dec. 2025.
30 Isla Isaga.

## Hawlgallo Wadajir ah

Inkasta oo aan weli la helin caddeymo rasmi ah oo muujinaya weerarro si toos ah oo wadajir ah ay u fuliyeen labada dhinac, ilo badan ayaa sheegaya in kooxuhu iska kaashadeen hawlaha amniga badda iyo sahminta.[31] Sheegashadan waxaa taageeraya xog uu sii daayey Taliska Maraykanka ee Afrika sanadkii 2022, taas oo diiwaangelisay aragtida maraakiib shaki leh oo lala xiriiriyay shabakado ay ku lug leeyihiin Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta, labadaba. Al-Shabaab ayaa bixisay xog sirdoon oo ku saabsan ciidamada reer galbeedka ee ku teedsan xeebaha Soomaaliya, halka Xuutiyiintu ay bixiyeen macluumaad ku saabsan dhaqdhaqaaqyada maraakiibta iyo diyaaradaha reer galbeedka ee ee howlgallada ka fuliya labada dal Somaliya iyo Yaman.[32]

Iskaashigan wuxuu u muuqdaa mid diiradda saaraya sugidda marinnada tahriibinta hubka iyo shidaalka; hawlo siinaya labada dhinac faa'iido dhaqaale oo weyn. Labada dhinac waxay hadda is-weydaarsadaan hub, hanti lacageed, mashaariic ganacsi, wadaagista aqoonta dhinacyada tignoolajiyada iyo tababarka dagaallada, iyo sidoo kale awoodaha sirdoon iyo kormeerka badaha. Iskaashigan ayaa si weyn u xoojiyay awoodaha hawlgal ee labada dhinac, balse wuxuu wiiqay amniga guud ahaan Geeska Afrika, Gacanka Cadmeed iyo Badda Cas. Iskaashiga Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta wuxuu noqday khatar goboleed sii kordhaysa, iyadoo uu muuqdo mid ku siqaya u guuritaan cad oo ku wajahan iskaashi xeeladaysan oo xaddidan.

# Ujeedooyinka Al-Shabaab ee Xiriirka

Helitaanka hubka iyo agabka la xiriira ayaa lagu tiriyaa ujeeddooyinka ugu waaweyn ee Al-Shabaab.[33] Yemen weli waa marin muhiim ah oo lagu kala gudbiyo hubka sharci-darrada ah ee loo tahriibiyo, (ka sokow waxyaabo kale), Soomaaliya. Intaa waxaa dheer, hubka casriga ah ee Iiraan ay siiso Xuutiyiinta ayaa Yemen ka dhigaya meel soo jiidasho leh oo Al-Shabaab ay "ka dukaamaysato" noocyo kala duwan oo hub ah, oo ay ku jiraan gantaallo masaafado dheer leh oo loo adeegsado hawlgallada badda iyo weerarro ka baxsan Yemen, walxo qarxa, qaraxyo gacmeedyo si fudud loo sameeyo, iyo diyaarado aan duuliye lahayn oo masaafad gaaban iyo mid dheerba leh. Haddii Al-Shabaab ay hesho xitaa tirooyin kooban oo ka mid ah tignoolajiyadan, awooddeeda ay ku sii wadi karto iska caabbinta ka dhanka ah dawladda Soomaaliya iyo ciidamada nabad-ilaalinta ee hoos yimaada hawlgalka AUSSOM ayaa si weyn u kordhi doonta.

Midda labaad, Inkastoo ilaalinta marinnada badda iyo ka hortagga ganacsiga sharci-darrada ah ay yihiin arrin udub-dhexaad ah.[34] Haddana, Al-Shabaab waxay gaari kartaa inta badan xeebaha Soomaaliya, gaar ahaan gobollada koonfurta iyo bartamaha. Iskaashiga ay la leedahay Xuutiyiinta wuxuu xoojiyaa awoodda kooxda ee ay ku difaacdo marinnada tahriibinta iyo ganacsiga sharci-darrada ah kana hortagto maraakiibta ciidan ee caalamiga ah. Xiriirkani wuxuu u saamaxayaa labada dhinac inay ka faa'iidaystaan wadaagga xogta badda iyo heshiisyo amni oo iskaashi ah.

31 Wakaalad Sirdoon oo aan la shaacin, Dec. 2025.
32 Sarkaal Sirdoonka Xuutiyiinta kamid ah, Sanca, Dec. 2025.
33 Sarkaal Al-shabaab kamid ah, Jilib, Dec. 2025.
34 Isla Isaga.

Midda saddexaad, maadaama Al-Shabaab iyo Xuutiyiintu labaduba ku hoos jiraan cunaqabatayn caalami ah, arrintaasi waxay ku qasbaysaa inay raadiyaan waddooyin kale oo lagu dhaqo lacagta oo lagu sameeyo maalgashi qarsoodi ah.[35] Xiriirkan ayaa fududeeya awoodda Al-Shabaab ay ugu wareejin karto uguna keydin karto lacagaha dalal ay ka mid yihiin Yemen, Cumaan iyo Suudaan, halkaas oo ay ka jiraan habab xawaaladeed aan rasmi ahayn ama aan si buuxda loo nidaamin. Al-Shabaab waxay ku tiirsan tahay shirkado ku xiran shabakado qoys ama qabiil, kuwaas oo qaarkood ka diiwaangashan deegaanno ay maamusho dawladda Soomaaliya, qaar kalena ku yaalla Yemen. Qaab-dhismeedyadani waxay u suurto geliyaan ururka inuu sii hayo furayaasha mishiinnadiisa maamul iyo hawlgal.

Iyadoo kaashanaysa Xuutiyiinta, Al-Shabaab waxay doonaysaa inay hesho ilaalin dadban oo ka dhan ah cadaadis milatari oo dibadeed. Waxay sidoo kale hiigsanaysaa inay ka hesho taageero farsamo iyo mid siyaasadeed Iiraan ama shabakado xiriir la leh,[36] isla markaana ay xoojiso sumcadeeda ah urur awood u leh inuu ka hawlgalo meel ka baxsan xuduudaha Soomaaliya.

In kasta oo ay jiraan kala-qaybsanaan caqiido oo qoto dheer oo u dhexeysa Sunniga iyo Shiicada, Al-Shabaab waxay ka faa'iidaysataa xiriirka ay la leedahay Xuutiyiinta si ay u xoojiso meeqaamkeeda diimeed iyo sharciyaddeeda jihaad. Kooxdu waxay isu soo bandhigtaa urur Islaami ah oo caalami ah oo ka madax-bannaan kala-duwanaanshaha mad'habta, waana sheeko kor u qaadda kaalinteeda gudaha kooxaha jihaadiga ah. Arrintani waxay si gaar ah muhiim u tahay marka ay la tartamayso ururro ay ka mid yihiin Al-Qaacidada iyo Daacish, kuwaas oo si dhow ula socda colaadaha gobolka si ay u qiimeeyaan saameynta, daacadnimada iyo fursadaha ciidan qorashada.

35 Isla Isaga.
36 Il sirdoon oo aan la shaacin karin, Tehran, Nov. 2025.

# Dhiirrigeliyeyaasha Al-Shabaab & Xuuthiyiinta

## Al-Shabaab

### Dhiirrigelin Istiraatiiji ah

- In la dhiso dawlad Islaami ah oo ka hanaqaadda Soomaaliya, kuna saleysan fikradda Al-Qaacida
- In laga saaro ciidammada shisheeye (AMISOM/AU, Maraykan, iyo kuwa deriska) Soomaaliya
- In la wiiqo, ugu dambaynna la rido Dawladda Federaalka Soomaaliya

### Dhiirrigelin Dhaqaale

- Helidda dakhli iyada qasab looga qaadayo bulshada soomaaliyeed
- Xakamaynta waddooyinka ganacsiga, dekedaha, iyo baraha kontoroolka
- Maalgelin sharci-darro ah: dhoofinta dhuxusha, tahriibinta, iyo afduub lacago madax-furasho ah laga sameeyo

### Khataraha

- Cadaadis militari oo joogto ah oo kaga imanaya ciidamada Soomaaliya iyo saaxiibada caalamiga ah
- Hoos-u-dhac hoggaamineed oo ka dhasha duqeymaha cirka iyo hawlgallada sirdoonka
- Halista caro iyo ka-soo-horjeedsashada shacabka soomaaliyeed oo ka dhalata waxyeellada rayidka iyo boobka dhaqaale ay u geystaan

## Xuutiyiinta

### Dhiirrigelin Istiraatiiji ah

- Xoojinta gacantooda siyaasadeed iyo tan militari ee ay ku leeyihiin Yemen
- Ka hortagga xukuumadaha Yemen ee iska soo horjeeda iyo isbahaysiga Sucuudiga hoggaaminayo
- Kordhinta saameynteeda gobolka iyada oo u mareysa isbahaysiga Iiraan
- In ay isu muujiyaan awood iska-caabin ah oo hortaagan faragelin shisheeye

### Dhiirrigelin Dhaqaale

- Xakamaynta dekedaha, soo-dejinta shidaalka, iyo dakhliga kastamka ay sameeyaan
- Ka faa'iidaysiga canshuur ururin iyo dhaqdhaqaaqyo dhaqaale oo la xiriira suuqyada madow iyo mid dagaal
- Sugidda kheyraadka lagu sii wadi karo maamulka iyo hawlgallada militari
- Adeegsiga cadaadis dhaqaale si ay ugu gorgortamaan mararka ay jiraan wadaxaajoodyada

### Khataraha

- Colaad hor leh oo uga timaadda Maraykan, UK, Israa'iil, iyo jilayaal kale oo goboleed
- Hoos-u-dhac sharciyad iyo taageero gudaha ah oo ka dhasha dhibaatooyin dhaqaale iyo colaadaha daba-dheeraada
- Ku-tiirsanaanta Iiraan oo xad-dhaaf ah, taas oo yareyn karta madaxbannaanida istiraatiijiyeed ee kooxda.

# Khataraha iyo Caqabadaha Horyaalla Al-Shabaab

Inkasta oo ay jiraan faa'iidooyinkan, Hadana, Al-Shabaab way garwaaqsan tahay khataraha la socda isbahaysigeeda Xuutiyiinta. Xiisadaha mad'habta ayaa ah caqabad weyn oo gudaha ah, waxayna horseedaan kala-qaybsanaan caqiido oo u dhexeysa Sunniga iyo Shiicada. Qaar ka mid ah culimada aadka u ad-adag ee ku jira Al-Shabaab ayaa si weyn uga soo horjeeda wax kasta oo xiriir ah oo lala yeesho kooxo Shiico ah,[37] taas oo muujinaysa kala-dillaac mabda'eed. Intaa waxaa dheer, kalsooni-la'aanta istaraatiijiyadeed weli waa walaac weyn. Xuutiyiintu waxay u shaqeeyaan heerar kala duwan oo madaxbannaani ah, balse ficilladoodu si joogto ah ayay ula jaanqaadaan ujeeddooyinka istaraatiijiyadeed ee Iiraan, taas oo keeni karta xiisado dheeraad ah haddii Al-Shabaab ay ku qancdo in iskaashigan uu mustaqbalka fog si ka badan tooda ugu adeegayo danaha Tehraan.[38]

Iskaashigan waxaa lagu sifeyn karaa mid ku dhisan pragmatism iyo dano la wadaago. Mabda'a diimeedku inta badan wuxuu u shaqeeyaa sida qalab siyaasadeed, halka ujeeddooyinka milatari iyo dhaqaale ay si isa soo taraysa u noqdeen kuwa mudnaanta leh. Iskaashigani wuxuu yareeynayaa hoos u dhaca taageerada dibadda ee ka imaanaysay Ururka Al-Qaacidada, wuxuuna sidoo kale wax ka dhimayaa awoodda ururka ee uu lacag uga uruuriyo gudaha Soomaaliya, taas oo u oggolaanaysa Al-Shabaab inay la qabsato duruufaha oo ay sii jirto.

## Ujeedooyinka Istaraatiijiyadeed ee Xuutiyiinta

Xuutiyiintu waxay maamulaan dhul ballaaran oo ku yaalla waqooyiga Yemen, oo ay ku jiraan dekedo muhiim ah oo ku yaalla Badda Cas sida Xudeyda, iyo sidoo kale waddooyin sahay oo waaweyn oo dhul iyo badba leh. Markii uu dagaalku qarxay sanadkii 2015, xoogga dagaalka iyo cunaqabatayntu waxay ku qasbeen Xuutiyiinta inay "ka fikiraan meel ka baxsan khaanadda", la qabsadaan duruufaha, aqoonsadaan ilo maalgelin oo cusub, isla markaana dhisaan shabakado saadka ah oo qarsoodi ah oo ka baxsan xuduudahooda dal. Isu furitaankooda dibadda ee ay ku wajahaan kooxo sida Al-Shabaab wuxuu ku salaysan yahay qiimayn istaraatiijiyadeed oo fursado iyo khataro labadaba leh.[39] Caqliyadaasi waxa ay ku dhisan tahay muhiimadda istaraatiijiyadeed ee marinnada badda ee u dhexeeya Soomaaliya iyo Yemen, iyo baahida loo qabo in la xaddido saameynta Boqortooyada Sacuudi Carabiya iyo Imaaraadka Carabta, si loo xoojiyo ka-hortagga fursad-raadinta siyaasadeed ee ay taageeraan Sacuudiga iyo Imaaraadku ee Yemen.

Inkasta oo falanqayntani ay ku salaysan tahay horumarradii uu xiriirku sameeyey ilaa dhammaadka 2025, haddana muuqaalka juqraafi-siyaasadeed ee is beddelaya -gaar ahaan is-beddelka doorka Sacuudi Carabiya iyo Imaaraadka ee Yemen iyo guud ahaan Badda Cas- wuxuu adkaynayaa baahida loo qabo faham firfircoon oo ku saabsan xiriirradan. Natiijooyinka warbixintu weli waa kuwo aad muhiim u ah, balse waa in lagu fasiraa indhaha dib-u-habaynta socota ee saameynta iyo saamileyda amniga gobolka.

37 Sarkaal Maktabka Dacwada Al-shabab ka tirsan, Bu'aale, Dec. 2025.
38 Sarkaal Al-shabab kamid ah, Jilib, Dec. 2025.
39 Sarkaal Sirdoonka Xuutiyiintak amid ah, Nov. 2025.

Qaybtani waxay falanqaynaysaa yoolasha Xuutiyiinta ee xiriirradan, farsamooyinka ay adeegsadaan, khataraha ay dareemayaan, iyo hababka ay isaga yareeyaan khataraha. Juqraafiyaddu waa qodob aasaasi ah. Soomaaliya iyo Yemen waxay ku kala yaallaan labada dhinac ee marin-biyoodka Bab al-Mandab, waxaana iskaashiga lala yeesho shabakado ka hawlgala xeebaha Soomaaliya -gaar ahaan deegaannada aan lahayn dawlad dhexe oo xooggan- u suurto geliyaan Xuutiyiinta marinnno kale oo ay ku gudbiyaan sahay, shidaal, ama qalab milatari. Xiriirradaasi waxay sidoo kale kor u qaadaan wacyiga xaaladda amni ee badda. Xuutiyiintu waxay ka helaan xog sirdoon oo ku saabsan dhaqdhaqaaqyada badda shabakadaha Al-Shabaab ee ku teedsan xeebaha Soomaaliya, taas oo xoojinaysa awooddooda ay ku yareeyaan khataraha uguna faa'iidaystaan fursadaha ka jira Badda Cas iyo Gacanka Cadmeed.[40]

Intaa waxaa dheer, cunaqabatayntu waxay saartay cadaadis dhaqaale Xuutiyiinta. Cunaqabatayntu waxay xaddiday helitaankooda suuqyada caadiga ah, taas oo ku qasabtay inay raadiyaan waddooyin ganacsi oo kale oo sharci-darro ah. Iskaashiga Al-Shabaab wuxuu ballaariyay fursadaha ay Xuutiyiintu ku geli karaan suuqyada,[41] wuxuuna fududeeyay iibinta shidaal, hub iyo rasaas, walxo qarxa, diyaarado aan duuliye lahayn, iyo ka ganacsi dahabka iyada oo loo marayo nidaamyo maaliyadeed oo aan rasmi ahayn iyo kuwo rasmi ahba. Iskaashigan wuxuu u oggolaanayaa Xuutiyiinta inay ka faa'iidaystaan hawlo maaliyadeed oo faa'iido sare leh, khatar yarna leh, kuwaas oo ay adag tahay in la daba-galo ama la kormeero.

Iskaashigani sidoo kale wuxuu dhisay awoodda ka-hortagga ee Xuutiyiinta.[42] Gelitaankooda, joogitaankooda, iyo ku fiditaankooda Soomaaliya waxay fariin xooggan u dirayaan cadowgooda Khaliijka iyo Maraykanka taasoo ah in awooddoodu ay ka gudubto xuduudaha juqraafiyeed. Tani waxay u suurto gelisaa inay baahiyaan qaab-dhismeeda howlgalkooda milatari iyo sirdoon, isla markaana si istaraatiiji ah u ururiyaan awoodaha, taas oo yareynaysa cadaadiska gudaha.

Sidoo kale, iskaashigu wuxuu xoojiyay awoodaha farsamo iyo xeeladeed ee Xuutiyiinta ee dagaalka casriga ah. Wadaagista macluumaadka ku saabsan walxaha qarxa ee si fudud loo sameeyo, miinooyinka badda, iyo diyaaradaha aan duuliye lahayn waxay adkaynaysaa awooddooda hawlgal. Haddii wax-soo-saarka maxalliga ah ama silsiladaha sahaydu go'aan, waxay ka soo xulan karaan iskaashiyo goboleed horey u jiray.[43] Dhacdooyin gaar ah -sida uu ka warheley Machadka (SI)- farsamooyin hal-abuur leh ayaa lagu tijaabiyay meelo ka baxsan Yemen, oo ay ku jirto Soomaaliya, ka hor inta aan gudaha Yemen lagu adeegsan, taas oo yaraynaysa khataraha isla markaana kordhinaysa adkaysiga iyo hufnaanta hawlgalka.[44]

Iskaashigani wuxuu sidoo kale quudinayaa ololayaasha dacaayadda ee Xuutiyiinta, wuxuuna xoojiyaa sharciyaddooda dibadda. La-shaqaynta kooxo sida Al-Shabaab waxay taageertaa sawirka ay Xuutiyiintu ka bixinayaan naftooda inay yihiin kuwo ka soo horjeeda Reer Galbeedka iyo dalalka Khaliijka, sawir si gaar ah uga dhex muuqan kara dhagaystayaashooda ka soo horjeeda Reer Galbeedka iyo kooxaha xagjirka ah.

40 Isla Isaga.
41 Isla Isaga.
42 Isla Isaga.
43 Isla Isaga.
44 Xubin Sare Al-shabaab, Bu'aale, Nov. 2025.

## Sida Loo Maareeyo Iskaashiga

Shabakado ganacsi oo gaar loo leeyahay -oo ay ku jiraan dhexdhexaadiyayaal, shirkado dahaaran, iyo macaamil qarsoodi ah- ayaa loo adeegsadaa kala wareejinta badeecooyin iyo walxaha qiimaha leh ee dhulka laga soo saaro, taas oo adkaynaysa dabagalka macaamilka Xuutiyiinta iyo Al-Shabaab. Iskaashiga sirdoon iyo saadka wuxuu diiradda saaraa maaraynta ganacsiga badda ee u dhexeeya Yemen iyo Soomaaliya, aqoonsiga khataraha, iyo ilaalinta marinnno qarsoon oo adag in la ogaado ama la kormeero.

Waxaa la soo wariyay in iskaashiga farsamo ee u dhexeeya Xuutiyiinta iyo Al-Shabaab uu yahay mid xulasho ah oo si taxaddar leh loo xakameeyo. Xogta ku saabsan dayactirka hubka, wax-ka-beddelka diyaaradaha aan duuliye lahayn, iyo walxaha qarxa ee sida fudud loo farsameeyo ayaa si xulasho ah loo gudbiyaa si loo ilaaliyo sirta loona difaaco shabakadaha muhiimka ah, badanaa iyada oo loo marayo dhinacyo saddexaad iyo shabakado maxalli ah, taas oo adkeyneysa asturnaanta xiriirrada tooska ah ee u dhexeeya hoggaannada sare ee labada dhinac.

## Khataraha ay Wajahayaan Xuutiyiinta

In kasta oo faa'iidooyinka istaraatiijiyadeed ay cad yihiin, iskaashigani wuxuu xanbaarsan yahay khataro waaweyn. Mid ka mid ah khataraha ugu muhiimsan ayaa ah in ka mid ahaanta Al-Shabaab nidaamka cunaqabataynta bartilmaameedsan ay keeni karto cunaqabatayn dheeraad ah oo lagu soo rogo Xuutiyiinta, isla markaana ay kordhiso suurtagalnimada in quwadaha caalamku u dhaqaaqaan inay sii wiiqaan Xuutiyiinta haddii iskaashigan la xaqiijiyo.[45] Soo-bixitaanka xogahan wuxuu wiiqi karaa hammiga siyaasadeed ee Xuutiyiinta, wuxuuna horseedi karaa hoos-u-dhac sharciyadeed iyo go'doomin dhaqaale oo sii korodha. Qabashada maraakiib, bangiyada, ama aaladaha lacag-dhaqidda waxay burburin kartaa shabakado dhan, isla markaana fashilin kartaa habraacyadooda amni ee hawlgalka. Xeer-dejinta caalamiga ah ee nidaamyada xawaaladda iyo suuqyada dahabka ee gobolka ayaa ka dhigaysa xiriirrada Soomaaliya iyo Yemen kuwo si gaar ah ugu nugul aqoonsiga qaababka ay adeegsadaan.[46]

Khataro mabda'yeed oo gudaha ah ayaa sidoo kale soo bixi, maaddaama la-shaqaynta dhaqdhaqaaq jihaadi Sunni ah ay kicin karto kala-qaybsanaan gudaha Zaydi-Shiiciga Xuutiyiinta ama ay khatar gelin karto xiriirrada ay la leeyihiin xulafada kale ee gobolka. Joogitaanka Ururka Al-Qaacidada ee Jasiiradda Carabta oo ah cadow toos ah ayaa sii adkaynaya maaraynta xiriirro kala duwan iyada oo aan la hurin khilaafyo gudaha ah ama dib-u-dhacyo hawlgal. Xuutiyiintu sidoo kale waa kuwo ka feejigan kharashaadka, maaddaama sii fidinta khadadka sahayda badda ay kordhiso khatarta, khasaarada, iyo kharashka oo sii kordha, isla markaana ay ka jeediso diiradda colaadda aasaasiga ah ee Yemen. [47]

45 Il sirddon, Xiitiyiinta ka tirsan balse aan la shaacin karin, Nov. 2025.
46 Isla Isaga
47 Isla Isaga

Hawl-galada dibadda ee Xuutiyiinta ayaa waxa ay ku qasbayaan inay qaadaan tallaabooyin lagu yareynayo khataraha. Hawlaha maaliyadeed, saadka, iyo sirdoonka ayaa loo kala qaybiyaa unugyo yaryar oo kala madax-bannaan si looga hortago in fashilka midkood uu wiiqo nidaamyada maamul iyo hawlgal ee Xuutiyiinta.[48] Waxay si weyn ugu tiirsan yihiin dhexdhexaadiyayaal maxalli ah si ay u dhisaan xeendaabyo u dhexeeya hoggaanka iyo howlaha maalinlaha ah. Inkasta oo ay sii kordhayso ku-tiirsanaanta Xuutiyiinta ee dahabka, dhagxaanta qaali ah, iyo nidaamyo xawaaladeed oo adag si loo qariyo dadaallada dabagalka, haddana waxay ilaashadaan awood ay ku diidi karaan masuuliyadda iyaga oo sii daaya farriimo dadweyne oo hoggaankooda ka fogeeya hawlaha sharci-darrada ah, kuna sifeeya ficilladaas shirkado ganacsi oo madax-bannaan.[49]

# Al-Shabaab, Al-Qaacidada Jasiiradda Carabta, iyo Xuutiyiinta: Hirdan iyo Iskaashi

Si loo qoto-dheereeyo fahamka xiriirka u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta, waxaa lama huraan ah in marka hore la salbaaro doorka Ururka Al-Qaacida ee Jasiiradda Carabta, (AQAP) maadaama uu yahay xulafada ugu dhow ee Al-Shabaab. Ururka AQAP wuxuu ka hawlgalaa Yemen, halkaas oo uu sannado badan dagaal kala soo horjeedey Xuutiyiinta. Dhacdadii ugu caansanayd waxay ahayd markii ururku ku guulaystay dilka Al-xuuti, aasaasihii dhaqdhaqaaqa Xuutiyiinta iyo hoggaamiyahoodii ruuxiga ahaa. Ilaa hadda, ma jiro wax heshiis rasmi ah oo u dhexeeya AQAP iyo Xuutiyiinta, inkastoo uu jiray hakad ku-meel-gaar ah oo ku yimid dagaalladii tooska ahaa tan iyo bilowgii ololihii milatari ee ballaarnaa ee isbahaysiga Sacuudigu hogaaminayo ee Yemen. Xaqiiqadani waxay caddeynaysaa in Xuutiyiinta iyo AQAP ay weli isu arkaan cadow aan isu tanaasul lahayn.

## Xiriirka u dhexeeya Al-Shabaab iyo Al-Qaacidada Jasiiradda Carabta: Asalka taariikheed iyo xaaladda hadda taagan.

Xiriirka u dhexeeya Al-Shabaab iyo AQAP wuxuu bilowday intii u dhaxaysay 2007 ilaa 2009, xilligaas oo dagaalyahanno Soomaaliyeed u tageen Yemen si ay uga faa'iidaystaan tababarradii jihaadiga ahaa ee uu bixinayey faraca Al-Qaacida ee halkaas ka hawlgala. Sannadkii 2012, markii Al-Shabaab ay si rasmi ah u adkaysay isbahaysigeeda Al-Qaacida kaddib baycaddii uu Godane la. galay Ayman Al-sawahiri, Ururka AQAP wuxuu noqday garabka kaalmo ee ugu dhow Al-Shabaab.[50] Labada dhinac waxay wadaageen aragti jihaadi ah oo caalami ah, waxayna is-dhaafsadeen dagaalyahanno, aqoon iyo xog; mid walbana wuxuu u arkaa kan kale meel ammaan ah marka ay jiraan duruufo adag, oo ay ku jiraan meelaha loo baxsado, dib-isu-ururinta iyo tababarka.

48 Isla Isaga.
49 Isla Isaga.
50 Aas'aase Al-shabaab, Nov. 2025.

Intii lagu jiray xilli uu Ururka AQAP la kulmay cadaadis xooggan, waxaa la sheegaa in Al-Shabaab ay qoondeysay ku dhowaad 30% dakhliga ay ka hesho lacagaha sida qasabka ah ay uga uruuriso gudaha Soomaaliya si ay taageero dhaqaale u siiso ururka.[51] Xilligaas, Al-Shabaab waxay gacanta ku haysay ku dhowaad toban gobol oo Soomaaliya ka mid ah, taas oo siisay awood dhaqaale oo ballaaran. Ururka AQAP aad buu u qaddariyey taageeradaas, waxaana la rumeysan yahay -sida ay muujinayaan qiimeynno sirdoon- inuusan weli ka maarmin taageerada dhaqaale ee Al-Shabaab.

Ilo xogeed ayaa xaqiijiyey in Ururka AQAP uu tababar siiyey xubno ka tirsan Al-Shabaab oo kus-aabsan dhinacyada walxaha qarxayada laga farsameeyo, samaynta bambaanooyinka, amniga dhi-jitaalka ah iyo isgaarsiinta maldahan,[52] iyo fulinta hawlgallo isku-duuban ay wada socdaan qaraxyo iyo weerarro toos ah. Dhanka kale, Al-Shabaab waxay siisay ururka taageero dhaqaale, waxayna la wadaagtay xogo sirdoon, gaar ahaan macluumaad ku saabsan hawlgallada milatari ee Reer Galbeedka ee ka jira aagagga badeed ee ku xeeran Soomaaliya iyo Yaman.

Labada dhinacba waxay haystaan aragti jihaadi ah oo Sunni ah. Ururka AQAP wuxuu u arkaa Al-Shabaab Mujaahidiin xulafo ah oo ku taagan qadiyad sharciyad diineed leh. Sannado badan, ururku wuxuu soo saarayey bayaano qoraal iyo muuqaalba leh oo uu ku ammaanayey hawlaha Al-Shabaab intii u dhaxaysay 2007 ilaa 2025, isagoo ku tilmaamay “Qalcad adag oo Islaamku ku leeyahay Afrika”.

## Dhinacyada Khilaafka Al-Shabaab iyo Al-Qaacidada Jasii-radda Carabta

Inkasta oo iskaashi jiro, haddana weli way jiraan kala duwanaansho istaraatiijiyadeed oo waaweyn oo saameeya jiritaanka labada urur. Mid ka mid ah walaacyada ugu waaweyn e lababa ururba waa tartanka hoggaanka ee ka dhex jira shabakadda ballaaran ee Al-Qaacida. Maadaama uusan jirin ku-dhawaaqis rasmi ah oo ku saabsan hoggaamiye guud oo cusub kaddib dilkii Ayman Al-sawaa-hiri. Faracyada Yemen iyo Soomaaliya labaduba waxay bilaabeen inay isu soo bandhigaan sidii dhaxal-sugayaasha ugu sharciyadda badan hanashada hoggaanka dhexe.

Sidoo kale waxaa jira farqi juqraafi iyo dhaqaale oo u dhexeeya Al-Shabaab iyo AQAP. Kan dambe wuxuu leeyahay masaaxad juqraafiyadeed oo si uun ammaan u ah gudaha Yemen, balse wuxuu la daalaa dhacayaa dhibaatooyin dhaqaale oo ka dhigay kuwo ku tiirsan taageerada Al-shabaab. Dhanka kale, Al-Shabaab waxay leedahay ilo dhaqaale oo xooggan oo ka yimaadda canshuur iyo lacag siyaabo qasab ah ay ku aruursato gudaha Soomaaliya, hase yeeshee waxaysan heysan gabbaad oo waqti dheer ay isu ilaaliyaan haddii ay wajahaan weerarro milatari oo ballaaran.

Kala duwanaansho kale oo muhiim ah wuxuu khuseeyaa Xuutiyiinta. AQAP wuxuu u arkaa Xuuti-yiinta Shiico aan diin lahayn, halka Al-Shabaab ay la gashay isbahaysi ku-salaysan dano dhaqaale iyo saad milatari. Kala qaybsanaantan waxay dhalisay doodo ka dhex curtay gudaha dhaqdhaqa-aqa Al-Qaacida.[53] Qaar ka mid ah xubnaha Ururka AQAP ayaa ku andacooday in Al-Shabaab ay ka leexatay caqiidada jihaadiga Sunni-ga ah; hase yeeshee, aragtidan uma muuqato mid taageero ka heysata hoggaanka sare ee ururka, sida ka muuqata wadahadallo sir ah oo u dhexeeya hoggaanka cusub ee AQAP iyo Al-Shabaab,[54] kuwaas oo aan la shaacin karin sababo amni awgood.

51 Isla Isaga.
52 Il sirdoon aan la shaacin karin oo xiriir la leh Al-shabaab.
53 Sarkaal ka tirsan Al-qaacidada Bariga Afrika, Nov. 2025.
54 Xiriiro aan la shaacin karin oo u dhexeeya AQ iyo Al-Shabaab oo uu helay Machadka Saldhig, Oct. 2025

## Al-Qaacidada Jasiiradda Carabta iyo Xuutiyiinta

Xuutiyiinta iyo AQAP waxaa dhex marey iska-horimaadyo toos ah tan iyo 2010, markii Xuutiyiintu bilaabeen kacdoon ka dhacay Sa'da.[55] Ururka AQAP wuxuu u arkaa Xuutiyiinta inay yihiin wakiil Iiraan u adeegaya oo doonaya inuu wiiqo aragtida Sunni-ga ee Yemen, halka Xuutiyiintu u arkaan ururka aalad ay adeegsadaan Sacuudi Carabiya iyo Maraykanka. Intii u dhaxaysay 2015 ilaa 2020, Xuutiyiintu waxay la wareegeen deegaanno badan oo uu Ururka Al-Qaacida ee Jasiiradda Carabta taariikh ahaan ku lahaa saameyn, oo ay ka mid yihiin Al-Bayda, Ma'rib, Abyan iyo kuwo kale.[56] Isballaarintan xuutiyiinta waxaa fududeeyay dib-u-dhacyadii waaweynaa ee AQAP ka soo gaadhay duqaymaha cirka ee Maraykanka oo dilay tiro ka mid ah hoggaamiyayaashiisa sare.

Daciifinta ay Xuutiyiintu ku sameeyeen AQAP ku gaarsiiyeen gudaha Yemen waxay sababtay hoos-u-dhac weyn oo ku yimid awoodda ururka ee maareynta marinnada tahriibinta hubka iyo shabakadaha lacag dhaqista. Tani waxay u suurtagelisay Al-Shabaab inay si toos ah ula xiriirto Xuutiyiinta, iyadoo ka faa'iidaysanaysa isbedelka awoodeen ee labada urur. Waqti ka dib, Al-Shabaab waxay qayb ka mid ah diiraddeedii AQAP u wareejisay heshiisyo ku qotoma hab-raacyo dhaqaale iyo saad milatari oo ay la gashay Xuutiyiinta.[57] Xuutiyiintuna waxay u adeegsadeen Al-Shabaab marin kale oo u ammaan badan oo ay kaga gudbaan Gacanka cadbeed iyo Badda Cas.

## Saddex-Xagalka: Al-Shabaab, Al-Qaacidada Jasiiradda Carabta, iyo Xuutiyiinta

Ururka Al-Qaacidada Jasiiradda Carabta iyo Ururka Al-Shabaab waxaa isku xira aragti, tababar iyo taageero dhaqaale. Al-Shabaab iyo Xuutiyiintu waxay iska kaashadaan istaraatiijiyad, ganacsi, sirdoon iyo sahay milatari.[58] Dhanka kale, Ururka AQAP iyo Xuutiyiintu waxay weli yihiin laba dhinac oo col ah, kuna lug leh iska-horimaad mabda' iyo mid milatari. Al-Shabaab waxay isu muujisaa dhexdhexaadiye aan rasmi ahayn oo u dhexeeya labada garab ee isku-haya gudaha Yaman si ay uga faa'iidaysato labadoodaba.[59] Tusaale ahaan, Al-Shabaab waxay ka faa'iidaysataa khibradda Ururka Al-Qaacida garabkiisa Jasiiradda Carabta ee jihaadka caalamiga ah, isla markaana uga faa'iidaysataa Xuutiyiinta helitaanka hubka iyo marinnada badeed ee qarsoon. Isla waqtigaasna, waxay si taxaddar leh uga qariyaan xiriirka midba midka kale, si ay u ilaashadaan taageerada ama dulqaadka labada dhinac.

Ugu dambayn, waxaa suurtogal ah in AQAP uu gaari karo go'aan ah in xiriirka Al-Shabaab ee Xuutiyiinta uu yahay khatar toos ah oo uu u arko khiyaano mabda'i ah, taas oo keeni karta -ugu yaraan- hoos-u-dhac iskaashi. Dhanka Xuutiyiinta, waxay u arki karaan xiriirkooda Al-Shabaab mid ku-meel-gaar ah, waxayna joojin karaan marka ay gaadhaan yoolashooda dhow. Sidoo kale, ku lug lahaanshaha Iiraan waxay u beddeli kartaa dabeecadda xiriirka siyaabo aan u adeegayn danaha Al-Shabaab. Haddii xiriirrada saddexda dhinac si cad loo kashifo, waxay wajihi karaan cunaqabatayn caalami ah oo sii adkaata iyo faragelin milatari oo isku-duuban.

55 Crisis Group (2014), The Houthis: From Sa'da to San'aa.
56 Isla Isaga.
57 Sarkaal Al-shabaab ka tirsan, Galgala, Nov. 2025.
58 Sarkaal Xuutiyiinta ka tirsan, Sanca, Nov. 2025.
59 Isla Isaga.

## Horumarrada suurtagalka ah ee iskaashiga

Marka la eego dhaqdhaqaaqyada hadda ka jira gobolka, oo ay ku jiraan colaadda Badda Cas iyo sii xoogaysiga isbahaysiga u dhexeeya Iiraan iyo Ruushka, iyo sidoo kale hoos-u-dhaca guud ee joogitaanka ciidanka Reer Galbeedka ee Afrika, waxaa muuqata in arrimo badan ay u kaxayn karaan xiriirka Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta dhanka iskaashi istaraatiiji iyo dhaqaale oo sii kordha. Qaybtani waxay qiimaynaysaa sida iskaashigan u sii ballaaran karo, waxayna soo bandhigaysaa fursadaha ay labada dhinac ka faa'iidaysan karaan, iyadoo muujinaysa khataraha ka dhalan kara.

Iskaashiga u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta wuxuu soo maray marxalado kala duwan sida aan horey usoo faafaahiney. Laga bilaabo dhammaadka sanadkii 2025, ilo maxalli ah[60] ayaa ku waramey in shuraakadu u bislaatay isbahaysi rasmi ah, inkastoo uu weli qarsoon yahay. Iskaashigu hadda wuxuu ka tallaabayaa isu-duwidda saadka iyo sirdoonka ee aasaasiga ah, kuna sii socdaa iskaashi siyaasadeed, warbaahineed, iyo iskaashi milatari oo toos ah.[61]

Xuutiyiintu waxay u arki doonaan xeebta dheer ee Soomaaliya iyo tabar-darrada dhismeed ee awoodaha badeed ee Soomaaliya fursad ay uga faa'iidaystaan kuna ballaariyaan hawlahooda. Al-Shabaab weli waa khatar xooggan inkastoo dadaallo waaweyn la sameeyay si loo wiiqo awooddeeda hawlgal. Hoos-u-dhaca cadaadiska ka imanaya dawladda Soomaaliya iyo xulafadeeda, iyo sidoo kale ciidanka deegaanka, wuxuu si degdeg ah Al-Shabaab u siin doonaa meel ay isku fidiso, ku adkayso shabakadaha dibadda, kuna dabasocoto istaraatiijiyadeeda mudnaanta leh.[62] Xoojinta iskaashiga ay la leedahay Xuutiyiinta waxay u oggolaan doontaa Al-Shabaab inay ka leexato go'doominta gudaha iyo tan caalamiga ah, isla markaana ay yareyso saameynta dib-u-dhacyada milatari iyo bartilmaameedsiga hoggaanka.

Isbeddellada gobolka ayaa sidoo kale saameeyay iskaashigan. Tan iyo 2023, Xuutiyiintu waxay weerarro ku qaadeen maraakiib caalami ah oo maraya marin-biyoodka Badda-cas iyo Gacanka Cadmeed, iyagoo ku sababeeyay ficilladooda taageero ay u muujinayaan Falastiiniyiinta iyo aargoosi ka dhan ah Israa'iil. Machadka (SI) wuxuu helay warbixinno sheegaya in Al-Shabaab ay suuragal tahay inay bixisey taageero xogeed oo la xiriirta hawlgallada badeed ee ay xuutiyiintu fuliyeen, iyadoo ka duulaysa aragtideeda mabda'eed ee dagaalka Qasa oo ay u aragto waajib diimeed.[63] Maqnaanshaha iskaashi sirdoon oo goboleed oo isku dhafan ayay ka faaideysteen labada kooxood, taas oo u sahlaysa in iskaashiga qarsoon ee u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta uu si ballaaran u koro iyada oo aan la ogaan.

Waxa ay u badan tahay in ay horumariyaan tubaha is-kaashiga saadka.[64] Xuutiyiintu waxay heli karaan marinnno tahriibin oo cusub oo ay ugu sii gudbaan Soomaaliya si loogu daabulo hub, shidaal, dahab iyo dawooyin, halka Al-Shabaab ay heli karto sahay iyo maalgelin ay ku sii waddo howlgalladeeda. Labada dhinacba waxay qarin karaan hawlahan iyagoo u ekaysiinaya doonyo kalluumeysi ama maraakiib ganacsi si ay u qariyaan ujeeddooyinkooda dhabta ah. Intaa waxaa dheer, waxaa la filan karaa in labada dhinac ay sii qoto-dheereeyaan iskaashiga dhinaca sirdoonka iyo dhanka tiknoolajiyadda. Xuutiyiintu waxay leeyihiin karti sare oo ku saabsan hawlgelinta diyaaradaha aan duuliyaha lahayn, isgaarsiinta ammaanka ah, iyo amniga xogta. Al-Shabaab wax-

60 Il sirdoon aan la shaacin karin oo ku sugan Yaman, Nov. 2025.
61 Isla Isaga
62 Sarkaal ka tirsan Dowladda Federaalka Somaliya, Muqdisho, Nov. 2025.
63 Ilo sirdoon aan shaacin karin oo ku kala sugan Sanca iyo Muqdisho, Dec. 2025.
64 Isla Iyaga.

ay u adeegsan kartaa aqoontan inay ku xoojiso isgaarsiinta maldahan, ku howlgeliso diyaarado aan duuliye lahayn oo kormeer iyo weerarba fuliya, isla markaana ay suuragal tahay inay hirgeliso xeelado doonyo badeed oo is-qarxin ah oo Xuutiyiintu hore u muujisay wax-ku-oolnimadooda. Iskaashiga dhaqaale ayaa sidoo kale noqon kara mid nidaamsan oo horumarsan. Labada dhinacba waxay si weyn ugu tiirsan yihiin nidaamyada xawaaladda iyo dhaqaale ku dhisan lacag kaash ah. Iyagoo nidaamkooda si sharci ah u mideynaya, waxay dhisi karaan shabakad lacag-dhaqid oo isku dhafan oo raad-raaciddeedu hooseyso ama ay adag tahay, taas oo u dammaanad qaadaysa ilo maalgelin oo joogto ah labada dhinac. Iskaashi siyaasadeed -inkastoo la filayo inuu sii ahaado mid qarsoon- waa suuragal kale. Xuutiyiintu waxay doonayaan inay sii qoto-dheereeyaan iskaashiga siyaasadeed ee ay la yeelanayaan horjoogayaal muhiim ah oo ka tirsan Al-Shabaab si ay u xoojiyaan saameyntooda gudaha Soomaaliya.

# Caqabadaha

Isballaarintu sidoo kale waxay xanbaarsan tahay khataro dabiici ah. Marka iskaashigu sii xoogaysto, waxaa la filan karaa in kormeerka iyo daba-galka sirdoonku kordhaan. Xannibaadaha badda, duqaymaha cirka ee sugan, ama qabashada shixnado hub ah waxay wiiqi karaan shabakadda oo dhan, gaar ahaan haddii adkaysigu xaddidan yahay oo shabakadda la qabto lagu gaari karo kuwa kale. Kala-duwanaanshaha mabda'eed -tusaale ahaan- weli waa xaddidnaan muhiim ah. Kala-qaybsanaanta Sunniga iyo Shiicada waxay wiiqi kartaa kalsoonida, waxaana suuragal ah in garabyada aadka xagjirka u ah ee gudaha Al-Shabaab ay u arkaan la-shaqaynta Xuutiyiinta mid mabda' ahaan aan la aqbali karin, taas oo kicin karta kala-qaybsanaan gudaha ah.

Cadowga gobolka ee Xuutiyiinta, gaar ahaan Boqortooyada Sacuudi Carabiya iyo Imaaraadka Carabta, waxay ka falcelin karaan iyagoo kordhinaya taageerada sirdoon iyo mid milatari ee ay siiyaan xulafada gobolka, iyadoo si gaar ah diiradda loo saarayo shabakadaha Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta. Ka-qayb ahaanshaha Iiraan sidoo kale wuxuu xanbaarsan yahay khataro dheeraad ah. Faragelin toos ah oo Tehraan ka timaadda waxay dhimi kartaa madaxbannaanida hawlgal ee Al-Shabaab, waxayna ku qasbi kartaa inay qaadato go'aanno ka hor imanaya yoolasheeda. Ugu dambayn, haddii isbahaysigu noqdo mid si cad u muuqda, Al-Shabaab waxay halis ugu jirtaa in lagu dhinac qoro Iiraan iyo Xuutiyiinta oo lagu daro nidaam cunaqabatayn caalami ah oo ballaaran, taas oo si weyn u wiiqi karta awooddeeda dhaqaale iyo milatari.

# Xaaladaha mustaqbalka

Mid ka mid ah xaaladaha suurtagalka ah waa korriin joogto ah, oo lagu garan doono sii xoogaysiga tahriibinta hubka iyo xiriirrada ganacsi, iyadoo Xuutiyiintu u soo baxayaan ilo lagu kalsoonaan karo oo hub iyo khibrad farsamo/hawlgal ah leh, halka Al-Shabaab ay helayso tiir dheeraad ah oo taageero milatari iyo dhaqaale isugu jira.

Xaalad kale oo taa beddelkeeda ah waa in iskaashigu xaddidnaado, halkaas oo xiriirku ku koobnaado kala iibsiga hubka iyo is-weydaarsiga xogta sirdoonka badda, iyadoo si ula kac ah looga fogaado isu-duwid siyaasadeed ama milatari oo si cad u muuqata.

Waxaa sidoo kale jiri kara fashil, maadaama cadaadis caalami ah oo xooggan ama khilaaf mabda'eed oo aan xal lahayn uu wiiqi karo shuraakada, taas oo ku qasbaysa Xuutiyiinta inay dib ugu laabtaan Yemen, isla markaana ka hor istaageysa Al-Shabaab marinnadii sahayda ee muhiimka ahaa. xaalad ka sii khatar badan waa in wakil ahaan loo adeegsado, halkaas oo Iiraan ama kooxo kale ay xiriirkan u adeegsan karaan dhisidda shabakad ballaaran oo ku fidsan Badda Cas iyo Badweynta Hindiya, taas oo si weyn u kordhinaysa welwelka amni ee gobolka iyo caalamkaba. Weli ma cadda in faragelintii milatari ee ugu dambeysay ee Sacuudi Carabiya ka samaysay Yemen, taas oo keentay bixitaanka Imaaraadka Carabta, ay ku dhiirrigelin doonto Riyadh inay uga faa'iidaysato dardar-galka si loo wiiqo Xuutiyiinta loona ilaaliyo Yemen mideysan oo hoos tagta dawladda caalamku aqoonsan yahay.

Caddeymaha oo dhan waxay muujinayaan in xiriirka u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta uu si tartiib ah ugu socdo dhanka iskaashi istaraatiiji ah oo sii xoogaysanaya. Al-Shabaab waxay u aragtaa iskaashigan mid muhiim u ah badbaadadeeda, helitaanka hub, iyo sii-jiritaankeeda, halka Xuutiyiintu ay doonayaan inay ka fogaadaan cunaqabatayn islamarkaana ay ilaashadaan heerkooda sarreynta ee gobolka.

## Saamaynta Xiriirka Labada Kooxood

Isbahaysiga istaraatiijiyadeed ee u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta wuxuu xanbaarsan yahay saameyn aad u ballaaran. Hawlgallada labada dhinac ee ka socda labada daamood ee iska soo horjeeda ee Gacanka Cadmeed iyo Badda Cas waxay si toos ah u taabanayaan amniga gudaha ee Soomaaliya, xasilloonida gobolka Geeska Afrika, badqabka ganacsiga caalamiga ah, iyo isu-dheelitirka awoodeed ee u dhexeeya jilayaasha gobolka iyo kuwa caalamkaba. Qaybtani waxay falanqaynaysaa saameyntan iyadoo loo kala saarayo Afar heer: Gudaha Soomaaliya, Heer goboleed, Heer caalami, iyo gudaha ururrada laftooda, gaar ahaan Al-Qaacida iyo Iiraan.

## Heer qaran

Xoogeysiga iskaashiga Xuutiyiinta waxay si weyn u kordhin kartaa ilaha dhaqaale iyo awoodaha saadka ee Al-Shabaab. Taasi waxay horseedi kartaa koror ku yimaadda weerarrada ama soo bixidda noocyo cusub oo weeraro ah, kuwaas oo ay suurto-gelinayaan helitaanka hub horumarsan, iyadoo la adeegsanayo walxo qarxa oo casri ah iyo qaraxyo gacan-ku-samays ah oo laga soo min-guuriyey farsamooyin laga sameeyey Yemen. Xukunkeeda dhuleed -gaar ahaan aagagga xeebaha- ayaa ballaaran kara, iyadoo diiradda saareysa gobollada waqooyi-bari iyo waqooyi-galbeed. Isbeddelladan waxay u badan tahay inay la socdaan kordhinta weerarrada magaalooyinka muhiimka ah, si loo muujiyo awood sii-jirta looguna wiiqo dadaallada dawladda ee xasillinta dalka.

Xiriirkani wuxuu sidoo kale kordhin karaa ku lug-yeelashada Al-Shabaab ee ganacsiga sharci-darrada ah. Waxaa la filan karaa inay kororto tahriibinta hubka iyo shidaalka ee xeebaha Soomaaliya, iyadoo ay weheliso qorshayaal lacag-dhaqid oo sii adkaada iyo hawlo suuq madow lagu fuliyo oo taageera ururka. Ganacsatada maxalliga ah ee xiriirka la leh Al-Shabaab ayaa yeelan kara kalsooni dheeraad ah maadaama isusocodka badeecadaha ka imanaya Yemen uu noqonayo mid fudud. Arrintani waxay sii dardar-gelin kartaa hoos-u-dhaca dakhliga dawladda, halka ay xoojin doonto dhaqaalaha is-barbar-yaalla ee ururka.

## Saamaynta amniga gobolka

Heer gobol, Iskaashiga Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta wuxuu khatar amni oo weyn ku yahay Badda Cas iyo Geeska Afrika. Badda Cas waa marin muhiim u ah ganacsiga caalamiga ah, waxayna isku xirtaa danaha Maraykanka, Shiinaha, Yurub, iyo dalalka Khaliijka. Weerarrada Xuutiyiinta ee maraakiibta badda, oo lagu daray shabakadaha tahriibinta hubka ee la xiriira Al-Shabaab, waxay khatar gelin karaan marinnada ganacsiga, waxayna kordhin karaan qiimaha caalamiga ah ee shidaalka iyo badeecooyin kale.

Waxaa jirta suurtagalnimada in ay wada fuliyaan weerarro badeed oo isku xiran, halkaas oo Al-Shabaab ay bixineyso xog sirdoon oo ka timaadda xeebaha Afrika, Xuutiyiintuna ay keenaan hub iyo khibrad farsamo. Xaaladda ugu daran, waa hawlgallo wadajir ah oo toos ah oo ay wada fuliyaan labada dhinac. Dalalka dariska ah sida Kenya, Itoobiya, iyo Jabuuti waxay wajihi doonaan cadaadis amni oo sii kordhaya sababtoo ah qulqulka hubka sharci-darrada ah, hanjabaadaha sii kordhaya ee ka dhanka ah dekedaha ganacsiga ee muhiimka ah sida Mombasa iyo Jabuuti, iyo u beddelidda marin-biyoodka Soomaaliya iyo Yemen goobo xasillooni-darro joogto ah.

## Saameynta caalamiga ah

Koboca iskaashiga Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta wuxuu khatar ku yahay sahayda shidaalka, maadoyyinka cayriinka ah iyo maraakiibta ganacsiga ee mara Badda Cas iyo Badweynta Hindiya. Waxa kale oo uu khatar gelinayaa khadadka tamarta ee muhiimka ah ee mara Gacanka Cadmeed una sii gudba Yurub. Weerarro aan isu-dheelitirnayn oo la isuku-duway oo ka yimaadda Soomaaliya iyo Yemen waxay si weyn u carqaladayn karaan ganacsiga caalamiga ah, waxayna kicin karaan sicir-barar, isla markaana abuuri karaan culaysyo dhaqaale oo aad uga baxsan xuduudda gobolka.

Iskaashigan wuxuu sidoo kale horseedi karaa marxalad cusub oo jihaadistayaal caalami ah. Waxa uu siin karaa Al-Qaacida fursad ay ku soo noolayso fiditaankeeda caalamiga ah. Xiriirka Xuutiyiinta ee liraan, ku xirnaanta Al-Shabaab ee Al-Qaacida, iyo xiriirrada liraan la leedahay qaybo ka mid ah hoggaanka sare ee Al-Qaacida, waxay abuuri karaan iskaashi argagixiso oo aan horay loo arag oo ka tallaaba kala-duwanaanshaha mad'habta.  Dowladda Maraykanka iyo xulafadeedu waxay u arki karaan isbahaysiga Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta khatar laba-geesood ah, taas oo ku qasbi karta inay kordhiyaan hawlgallada la-dagaallanka argagixisada, oo ay ku jiraan duqeymo cirka ah oo dheeraad ah oo ka dhaca Soomaaliya iyo Yemen.

## Saamaynta gudaha ururrada

Xiriirrada ka dhex jira gudaha shabakadda ballaaran ee Al-Qaacida waxay kicin karaan khilaafaad gudaha ah. Al-Qaacidada Jasiiradda Carabta ayaa u arki karta isbahaysiga Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta khiyaano mabda'eed. Isla mar ahaantaana, hoggaanka dhexe ee Al-Qaacida wuxuu wajihi karaa caqabado sii kordhaya oo ku saabsan isu-waafajinta danaha iyo daacadnimada kala duwan ee faracyadeeda. Haddii khilaafaadkani sii xoogaysto, waxay keeni karaan kala-qaybsanaan ururka dhexdiisa ah ama soo bixidda kooxo gooni-goosad ah oo leh ujeeddooyin kala duwan.

65 Sarkaalka Al-shabaab ka tirsan si dhowna xiriir ula leh Al-Qaacida, Nov. 2025.

Isbahaysiga u dhexeeya Iiraan iyo Xuutiyiinta isna wuxuu xanbaarsan yahay khataro muuqda. Marka laga eego dhinaca Tehraan, xiriirro sii xoogeysta oo u dhexeeya Xuutiyiinta iyo Al-Shabaab waxay soo jiidan karaan feejignaan caalami ah oo dheeraad ah, taas oo ku qasbi karta hoggaamiyeyaasha Iiraan -kuwaas oo haddaba wajahaya cadaadis caalami ah- iney dib u qiimeeyaan faa'iidooyinka istaraatiijiyadeed ee shabakadahan marka loo eego cawaaqibta diblomaasiyadeed iyo milatari. Xuutiyiinta laftoodu waxay geli karaan dooddo gudaha ah, maadaama qaar ka mid ah culimada iyo taageerayaasha Zaydiya ay si adag uga soo horjeesan karaan la-shaqaynta koox argagixiso Sunni ah sababo caqiido awgood.

## Natiijooyin Juqraafi-Siyaasadeed

Iskaashigan wuxuu sidoo kale dib u qaabayn karaa isu-dheellitirka awoodaha ee Badda Cas. Xuutiyiinta ayaa heli kara marinno u furan Badweynta Hindiya, halka Al-Shabaab ay ka faa'iidaysan karto amni badeed hagaagsan balaarinta howlaheeda tahriibka. Dalalka Reer Galbeedka -gaar ahaan Maraykanka iyo xulafadiisa- waxay wajihi karaan caqabado amni oo sii kordhaya, taas oo u baahan doonta kordhinta joogitaanka milatari ee Jabuuti iyo Soomaaliya. Isla waqtigaas, kooxo kale oo xagjir ah oo ka jira gobolka, sida Daacish-Soomaaliya iyo Ciidammada Isbahaysiga Dimuqraadiga ah ee Kongo, ayaa qiimeyn kara oo ku dayan kara qaybo ka mid ah hababka Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta,[66] taas oo sii xoojinaysa khatarta baahsan ee xagjirnimada Afrika oo dhan.

Gebogebadii, xiriirka u dhexeeya Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta waa arrin ka tallaabeysa Soomaaliya, wuxuuna xanbaarsan yahay saameyn istaraatiiji ah oo caalami ah. Waxa uu si toos ah u saameeynayaa amniga badda, siyaasadda gobolka, iyo ganacsiga caalamiga ah. Saameyntan waxaa si fiican loogu fahmi karaa afar heer oo isku-xiran: gudaha Soomaaliya oo ay ku xoojinayso Al-Shabaab; guud ahaan Geeska Afrika oo ay ku wiiqayso amniga iyo ganacsiga; heer caalami oo ay ku khatar gelinayso marinnada tamarta iyo hab-socodka ganacsiga caalamiga ah; iyo gudaha ururrada laftooda oo ay ku sii hurinayso khilaafaadka mabda'eed iyo kuwa istaraatiijiyadeed. Isbahaysiga Al-Shabaab iyo Xuutiyiinta wuxuu noqday khatar siyaasadeed, amni, iyo dhaqaale oo weyn, taas oo u baahan jawaab caalami ah oo wadajir ah oo isku duwan.

66 Sarkaal Daacishta Soomaaliya kamid ah, Qandala, Dec. 2025.

# Talo soo jeedin

Xiriirka Al-Shabaab iyo Xuutiyiintu sidiisa uma aha dhibaatada lafteeda, balse waa astaan ka dhalata xaalad dhismeed oo ka ballaaran oo ka jirta badda cas. Xaaladdan waxay muuqaal ahaan ka dhalataa isu-imaatinka saddex awoodood: kala-qaybsanaanta madax-bannaanida ee ku teedsan xeebaha, tartan goboleed iyo mid ka baxsan gobolka oo sii xoogeysanaya, iyo la-qabsiga istaraatiijiyadeed ee jilayaasha aan dawladaha ahayn ee ka shaqeeya hooska xadka colaadda furan. Meesha ay saddexdan awoodood isugu yimaaddaan, shabakadaha badeed ee sharci-darrada ah way ku kobcaan; sidaas darteed, jawaab kasta oo siyaasadeed oo wax ku ool ah waa inay ka fogaataa in xiriirkan loo arko arrin ku gaar ah la-dagaallanka argagixisada. Waa in loo wajahaa dhibaato la xiriirta maamulka badda iyo nidaam goboleed. Yoolku ma aha oo keliya burburinta hal shabakad, balse waa beddelidda deegaanka istaraatiijiga ah ee ka dhigaya shabakadaha noocaas ah kuwo suurtagal ah oo guuleysta.

Danaha istaraatiijiga ah ee Soomaaliya kuma koobna in la jebiyo Al-Shabaab, balse waa dib usoo celinta awood wax ku ool ah oo ay ku maamusho badaheeda iyo dhaqaaleheeda. Xiriirka Xuutiyiintu wuxuu khatar noqdaa -si gaar ah- marka maamulka xeebaha Soomaaliya ay wali yihiin kuwo taagdaran isla markaana muran siyaasadeed ka taagan yahay. Heerka istaraatiijiga ah, Soomaaliya waa inay u aragto amni-darrada baddeeda arrin madax-bannaani qaran taabaneysa, ee aan kaliya loo arkin khatar amni. Habkan waxa kale uu xambaarsan yahay in biyaha Soomaaliya aysan ahayn ban dhexyaal ah ama aag ka caagan tartan goboleedka. Sidoo kale, Dowladda Soomaaliya waa inay xoojisaa dhammaan noocyada ka-qayb ahaansho ee caalamiga ah -amni, ganacsi, iyo diblomaasiyadeed- kaasoo ku saleysan lahaanshaha Soomaaliya ee xeebaheeda iyo dekedaheeda. Dib-u-qaabayntan waa mid go'aan ah; la'aanteed, Soomaaliya waxay halis ugu jirtaa in loo arko deegaan fudud oo la adeegsado halkii ay ka ahaan lahayd jilaa istaraatiiji ah.

Waxaa kale oo Khatar istaraatiiji dhexe ah in si xad-dhaaf ah loo ciidameeyo xeebaha iyada oo aan la dhisin sharciyad ama beddel dhaqaale. Joogitaanka ciidan/amni dibadeed oo culus, balse aan ku xirneyn maamul-wanaagsan, waxay u badan tahay inay kordhiso qiimaha marinnada tahriibka, taasoo ku riixeysa jilayaasha sharci-darrada in ay howlahooda qarsoodi dheeri ah sii geliyaan, isla markaana siyaasad ahaan ka fogeyso bulshooyinka xeebaha. Danta muddada-fog ee Soomaaliya waxay ku jirtaa joogitaan dawladnimo oo tartiib-tartiib ah, kuma jirto awood muujin goos-goos ah. Xasilloonidu kuma iman doonto in ciidan ahaan xeebaha/badda loo maamulo, balse waxay ku iman doontaa in howlaha sharci-darrada ah ee badda laga dhigo kuwo aan sii waari karin siyaasad ahaan iyo dhaqaale ahaan.

Sidaa awgeed, waxaa loo baahan yahay dib-u-meeleyn istaraatiiji ah oo amniga badda ula dhaqanta sidii kaabayaal hay'adeed, oo aan la dhigin joogitaan goos-goos ah. Intaa waxaa dheer, waxaa loo baahan yahay maalgashi ballaaran si loo dhiso awoodo maamul oo sii jiri kara hawlgallada kadib. Waxaana ka sii muhiimsan in la garowsado in xasilloonida aan lasoo waaridi karin ama qasab lagu keeni karin; balse waa inay ku tiirsanaataa saldhig maxalli ah oo ay xoojiyaan heerar goboleed. Inkasta oo edbinta milatari ay weli lama huraan tahay, haddana istaraatiiji ahaan waa mid aan dhameystirneyn haddii uusan la socon xasillinta siyaasadeed iyo midda dhaqaale.

Si kastaba, dhisidda maamulku waa in si taxaddar leh loo fuliyo. Mid ka mid ah qaababka ugu waxyeellada badan ee ka jirta deegaanada nugul waa abuurista nidaamyo isbarbar-yaalla, oo ay ku jiraan habab amni iyo dhaqaale oo ka tallaaba hay'adaha dawladda si loo dedejiyo ama loo fududeeyo macaamillada. Inkasta oo hababkan ay u ekaan karaan kuwo wax ku ool ah muddada gaaban, haddana muddada dheer waxay wiiqaan sharciyadda dawladda, caadiyeeyaan habraac aan rasmi ahayn, waxayna ballaariyaan howlaha shabakadaha xagjirka ah iyo kuwa dambiyada. Jilayaasha dowligaiga ah waa inay mudnaan siiyaan la jaanqaadka qaab-dhismeedka dawladda xitaa marka qaababkaasi aanay dhammaystirnayn.

Badda Cas ma aha marin badeed daafo-yaal ah; balse waxa uu noqday halbowle nidaami ah ee ganacsiga caalamiga ah iyo muujinta awoodda goboleed. Waayo-aragnimadu waxay na bartay in kali-abaarka ee dawlad walba ay daba socoto heshiisyada laba-geesood ah oo ku dhisan dano gaaban - abuuraan duruufo ay ka faa'iidaystaan isbahaysiyo guracan. Jilayaasha gobolka waa inay ku midoobaan hal mabda' istaraatiiji ah: in Badda Cas iyo Bab-al-Mandab aan loo beddelin aagag ay ururada aan dawliga ahayn ku metelaan awoodda dawladaynta. Tani uma baahna isu-ekayn mabda'eed ama isbahaysiyo rasmi ah; waxa kaliya oo loo baahan yahay waa heerka ugu yar oo is-afgarad ah oo ku saabsan waxa aan la aqbali karin.

Inta badan, hardanada abuura xasilooni-darrada waa marka tartan goboleedka loo raro deegaanada nugul. Marka loollanka saamayntu u dhaco si dadban -iyadoo loo marayo dekedo, shabakado aan rasmi ahayn, ama wakiillo- ururrada aan dawliga ahayn waxay noqdaan dhex-dhexaadiyeyaal saad. Istaraatiiji ahaan, quwadaha gobolka waa inay ka soocaan tartamadooda ballaaran dhulka iyo biyaha Soomaaliya, isla markaana ka fogaadaan isticmaalka xeebaha, siyaasadaha aqoonsiga, ama mudnaanta ganacsi sidii qalab fariin-istaraatiijiyeed oo kale.

Waa in la garowsadaa in faa'iidooyinka muddada gaaban ee ka dhasha kala-qaybsanaantu ay dhalinayaan deganaan la'aanta fog oo saameeysa dhammaan saamileyda Badda Cas. Sidaa darteed, is-xakamayntu ma aha fal samafal ah am isu tanaasul ah waaqici ah; waa in loo arkaa maareyn khatar.

Heerka istaraatiijiga ah, Xiriirka Al-Shabaab iyo Xuutiyiintu wuu sii jirayaa sababtoo ah waxa uu xallinayaa saddex dhibaato oo labadaba khuseeya. Marka hore, waxa uu fududaynayaa gelitaanka marinnada, suuqyada, iyo sirdoonka. Marka labaad, waxa uu xoojinayaa adkeysigooda marka ay wajahaan cunaqabatayn iyo go'doon sii kordhaya. Marka saddexaad, waxa uu u saamaxayaa inay ku andacoodaan diidmo macquul ah iyagoo ka shaqeynaya hoos ka-xadka iska-horimaad furan. Sidaas awgeed, jawaabta istaraatiijiga ah waa inay meesha ka saartaa dhiirrigeliyeyaashan, halkii ay ka beegsan lahayd oo keliya muuqaalkooda. Taas macnaheedu waa in diiradda la saaro kordhinta kharashka siyaasadeed iyo dhaqaale ee fududeynta hawlaha badeed, yarraynta ceeryaanta u saamaxda iskaashi la inkiri karo, iyo laba-laabidda dadaallada lagu yareynayo masaaxadaha aan la maamulin -kuwa sharci, dhaqaale, iyo maaddiba- ee kobciya xiriirrada noocan ah. Marka fududeyntu noqoto mid khatar leh, aan la isku halayn karin, isla markaana muuqata, isbahaysiyada pragmatiga ahi waxay lumiyaan qiimahooda.

Badda Cas iyo Bab-al-Mandab waa in dib loogu sawiraa aag dan wadaag ah. Taariikhdu waxay muujinaysaa in marka marinnada badeed loo arko hanti wadar-eber ah ay soo jiitaan ciidameyn iyo tartan wakiilnimo, taas oo abuureysa deegaan ku habboon ganacsi sharci-darro ah. Xasilloonida muddada dheer waxay ku tiirsan tahay maamul la saadaalin karo ee kuma tiirsana gacan-ku-hayn iyo heeryo shiisheeye, waxay ku tiirsan tahay xeerar iyo iskaashi u adkaysan kara isbeddellada siyaasadeed.

## Xaaladda istaraatiijiyadeed kama dambaysta ah

Xaaladda kama dambaysta ah ee la doonayo ma aha in la tirtiro khatar kasta, maadaama taasi ay tahay yool aan suurtagal ahayn. Balse, yoolku waa deegaan Badda Cas ku yaalla oo aysan kooxaha hubeysan ee sharci-darrada ahi u adeegsan karin ban-badeed si ay u gaaraan faa'iidooyin istaraatiiji ah. Sidoo kale waa in la abuuraa deegaan ay bulshooyinka xeebuhu ka helaan faa'iido weyn ka ganacsiga sharci ah marka loo eego fududeynta kuwa sharci-darrada ah, isla markaana ay quwadaha gobolku u arkaan xasilloonida ay tahay jidka ugu ammaanka badan ee saamaynta ee aysan ku jirin kala qaybinta.

Abuurista jawigaan oo kale, isbahaysiyada sida kan Al-Shabaab iyo Xuutiyiintu waxay noqdaan kuwo istaraatiijiyan dulsaar ah, farsamo ahaanna nugul.

MACHADKA SALDHIG

SALDHIG INSTITUTE

MACHADKA SALDHIG
SALDHIG INSTITUTE

www.saldhig.org

/ saldhigInstitute
/ saldhigInstitute
/ saldhigInstitute
www.saldhig.org